**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD**

**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 14aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 01/02/2025* |


# XEERKA HAY'ADDA HAWL-GABKA IYO XAQSIINTA SHAQAALAHA DAWLADDA
# XEER LR. 108/2024


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**



*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2025*

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND
جمهورية صوماليلاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT
مكتب الرئيس

TIX: JSL/XM/GW/081-040/012025

Taar: 18/01/2025

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Hay'adda Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 108/2024;

**Markii aan arkay:** Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan arkay:** Qoddobka 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan arkay:** Qoddobka 38aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markii aan helay:** Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiillada (Go'aan Lr; GW/KF-10/30/2024) ee summaddiisu tahay Ref; GW/G/10/376/2024, kuna taariikhaysan 30/12/2024, laguna ansixiyay Xeerka Hay'adda Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 108/2024;

Waxa aan Soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu faafinayo Dhaqan-galka Xeerka Hay`adda Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 108/2024.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda Xeer Lr. 108/2024.**

## GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay: -** Qodobbada 20aad, 38aad, 53aad, 75aad, 76aad iyo 77aad ee Dastuurka Qaranka JSL

**Markuu Arkay: -** In Shaqaalaha dawladda oo udub dhexaad u ah hawl socodsiinta iyo gudashada waajibaadyada hay'adaha dawladda, isla markaana ay xaq u leeyihiin inay helaan xuquuqdooda hawlgab iyo xaqsiineed.

**Markuu Arkay: -** Muhiimadda ay leedahay in la dejiyo nidaam hawlgab iyo xaqsiin ay xuquuqdooda ku helaan shaqaalaha dawladda ee hawlgabka ahi, si loo gaadho ujeeddooyinka dib u habaynta, maaraynta iyo maamulka shaqaalaha dawladda

**Markuu tixgeliyay: -** Soo jeedinta xukuummadda ee ah in lagu dhisayo hay'ad qaabilsan hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda.

**Markuu Dhagaystay :** Soo jeedinta Guddida Arrimaha Bulshada u qaabilsan oo talooyin iyo soo jeedimo wax ku ool ah Golaha ka siisay muhiimada iyo baahida xeerkani uu leeyahay.

RECEIVED BY PRESIDENCY: 31 DEC 2024 Reg No: 1342

**Markuu Arkay**: Go'aanka Ansixinta xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda , **Xeer Lr. 108/2024** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **10/07/2024** kalfadhigii **8aad** fadhigiisi **13aad.**

**Markuu Arkay**: In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen todoba iyo afartan **(47)** cod xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda , **Xeer Lr. 108/2024** kuna taariikhaysnaa **09/10/2024**

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **55 cod oo** gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda , **Xeer Lr. 108/2024** .

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Yaasiin X.Maxamuud Xiir (Faratoon) |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada | Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL. |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu arkay:-** Qodobbada 20$^{aad}$, 38$^{aad}$, 53$^{aad}$, 75$^{aad}$, 76$^{aad}$ iyo 77$^{aad}$ ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu arkay:-** In Shaqaalaha dawladda oo udub dhexaad u ah hawl socodsiinta iyo gudashada waajibaadyada hay'adaha dawladda, isla markaana ay xaq u leeyihiin inay helaan xuquuqdooda hawlgab iyo xaqsiineed.

**Markuu arkay:-** Muhiimadda ay leedahay in la dejiyo nidaam hawlgab iyo xaqsiin ay xuquuqdooda ku helaan shaqaalaha dawladda ee hawlgabka ahi, si loo gaadho ujeeddooyinka dib u habaynta, maaraynta iyo maamulka shaqaalaha dawladda.

**Markuu tixgaliyay:-** Soo jeedinta xukuummadda ee ah in lagu dhisayo hay'ad qaabilsan hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda.

**Markuu dhagaystay:** Soo jeedinta Guddida Arrimaha Bulshada u qaabilsan oo talooyin iyo soo jeedimo wax ku ool ah Golaha ka siisay muhiimada iyo baahida xeerkani uu leeyahay.

**Markuu arkay** Wax ka beddelka iyo kaabista Golaha Guurtidu ku soo sameeyeen Xeerkan Hay'adda Hawlgabka & Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda Xeer Lr. 108/2024

**Wuxuu ansixiyay**
**Xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta**

**Shaqaalaha Dawladda**

**Xeer Lr. 108/2024**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA KOOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa: Xeerka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

### Qodobka 2aad
### Erey bixin

Xeerkan gudihiisa, haddii aan si kale nuxur ahaan loogu tilmaamin, ereyada iyo weedhaha hoos ku qorani waxay yeelanayaan macnaha halkan lagu siiyay: -

**Qiimayn hawlgab:** Waxa loola jeedaa qiimayn uu sameeyo qof aqoon u leh arrimaha hawlgabka, si loo go'aamiyo xaaladda maaliyadeed iyo hantiyeed ee Hay'adda Hawlgabka, iyada oo laga duulayo mabaadii'da hawlgab ee caalamiga ah iyo qiimaha qaadhaanka ku habboon, si loo xaqiijiyo xasilloonida maaliyadeed ee Hay'adda Hawlgabka, si waafaqsan halbeegyada ururka hawlgabka caalamiga ah.

**Khabiir hawlgab:** Waxa loola jeedaa qofka masuulka ka ah qiimaynta lacagaha hawlgabka ee hadda taagan iyo kuwa mustaqbalka, si loo go'aamiyo hantida maaliyadeed ee Hay'adda Hawlgabka, iyada oo la raacayo nidaamka hawlgabka ee caalamiga ah.

**Codsade:** Waxa loola jeedaa qofka ka dalbanaya lacagta hawlgabka ama faa'iidada dhaxalka Hay'adda Hawlgabka.

**Caddayn da'eed:** Waxa loola jeedaa qoraal ka soo baxay hay'ad caafimaad oo sheegaya da'da qofka, si waafaqan xeerkan.

**Dheef:** Waxa loola jeedaa xaqa hawlgabka iyo gunnooyinka ee la siiyo shaqaalaha dawladda ama dadka leh dhaxalka qofka shaqaalaha ah ee dhinta, si waafaqsan xeerkan.

**Guddi:** Waxa loola jeedaa guddida sare ee maamulka Hay'adda Hawlgabka ee loo dhisay si'waafaqsan xeerkan.

**Ilmo:** **Waxa loola jeedaa ilmo kasta oo uu dhalay shaqaale dawladeed oo hawlgab xaq u yeeshay, da'diisuna tahay 15 jir iyo wixii ka yar, marka waalidkiisu dhintay iyo ilmaha isaga oo uurka ku jira aabbihii geeriyooday.**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Caddaynta naafannimo:** Waxa loola jeedaa qoraal ka soo baxay hay'ad caafimaad oo sheegaya ama muujinaya naafannimada qofka shaqaalaha ah, si waafaqsan xeerkan.

**Qaadhaan:** Waxa loola jeedaa xaddiga lacageed ee boqollayda ah ee laga jaro mushaharka aasaasiga ah ee qofka shaqaalaha dawladda ah ee wasaaradda, hay'adda uu ka shaqeeyo ama xisaabaadku ka jaraan, laguna daro Hay'adda Hawlgabka.

**Naafo:** Waxa loola jeedaa qof jidh ahaan ama maskax ahaan naafo ah, naafannimadaas oo sababtay in uu qofku shaqayn kari waayo loona go'aamiyay si waafaqsan habraacyada xeerkan.

**ka soo hor maray:** Waxa loola jeedaa xaqa hawlgabka ee la qaato dhammaadka shaqada ka hor, da'da hawlgabka.

**Agaasimaha Guud:** Waxa loola jeedaa qofka agaasimaha guud ah ee maamulaya Hay'adda Hawlgabka, si waafaqsan xeerkan.

**Sannad maaliyadeed:** Waxa loola jeedaa sannad maaliyadeedka caadiga ah ee ka bilaabma kowda Jeenawari kuna dhammaada 31ka Diisambar sannad kasta.

**Hay'adda:** Waxa loola jeedaa Hay'adda Hawlgabka Shaqaalaha Dawladda Somaliland ee loo aasaasay, si waafaqsan xeerkan.

**Adeeg mustaqbal:** Waxa loola jeeddaa adeegga uu qof shaqaale dawladeed ahi u qabto hay'ad ama wax ka badan, wixii ka dambeeya dhaqangalka xeerkan.

**Wasiir:** Waxa loola jeedaa wasiirrada ku jira maamulka sare ee Hay'adda Hawlgabka.

**Adeeg hore:** Waxa loola jeedaa adeeg uu shaqaale hawlgab xaq u lihi u qabtay hay'ad dawladeed, wixii ka horreeyay xeerkan.

**Shaqaale dawladeed:** Waxa loola jeedaa qof kasta oo shaqaale dawladeed ah, si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda;

**Xisaabta Keydka:** Waxa loola jeedaa xisaabta lagu shubo lacagaha loogu talagalay wixii isbeddel ama xaalado degdega ah.

**Lacagaha dheeraadka ah:** Waxa loola jeedaa hadhaaga xisaabta la qoondeeyay sannadka.

**Dhaxlayaasha:-** Waxa loola jeedaa ilmaha ama xaaska (rag iyo dumarba) qofka xaqa hawlgabku u sugnaaday, kaas oo uu dhalay ama qabay qofka geeriyooday, kaas oo helaya xaqii marxuumka, si waafaqsan xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 3^aad^

## Ujeeddooyinka xeerka

Ujeeddooyinka xeerkan waxa ka mid ah:-

1. In la dejiyo xeer jidaynaya xaqa hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda, isla markaana faahfaahinaya hannaanka hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda.
2. In lagu nidaamiyo sidii ay u heli lahaayeen xaqa hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda ee muddada dheer u soo shaqaynayay qaranka.
3. In la qeexo habraacyada hawlgabka, iyada oo la raacayo halbeegyada caalamiga ah ee hawlgabka.
4. In la abuuro qorshe dhaqaale oo lagu aasaaso sanduuq lagu keydiyo qoondo maaliyadeed oo loogu talagalo cududda shaqaale ee gaadha da'da ama marxaladda hawlgabka iyo saamiga ay dawladdu kaga qayb qaadanayso.
5. In lagu aasaaso isla markaana lagu qeexo doorka maamul ee Hay'adda Hawlgabka, taas oo noqonaysa mid u xilsaaran ururinta, xisaabinta, bixinta lacagaha hawlgabka, xaqsiinta iyo ka midho dhalinta Hay'adda Maalgashiga, si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah ee arrimahaas la'xidhiidha.

## Qodobka 4^aad^

## Xadka adeegsiga xeerka

1. Xeerkan waxa lagu dhaqayaa, isla markaana lagu dabbaqayaa dhammaan shaqaalaha dawladda ee lagu maamulo Xeerka Shaqaalaha Dawladda.
2. shaqaalaha ka hawlgala hay'adaha ee aan lagu dabbaqayn Xeerka Shaqaalaha Dawladda Xeer.Lr.97/2021, sida shaqaalaha Golayaasha Baarlamaanka, Bangiga Dhexe, Hantidhawraha Guud, hay'adaha dakhli soosaarka ee sida gaarka ah looga reebay Xeerka Shaqaalaha Dawladda iyo shaqaalaha dawladaha hoose.
3. Nidaamka hawlgabka shaqaalaha ku tilmaaman faqradda 2aad, diiwaangalinta xogtooda, qiimayntooda, xaqiijintooda iyo hawlaha la'xidhiidha waxa lagu faahfaahinayaa xeer-nidaamiye gaar ah oo aan ka hor imanayn xeerkan.
4. Xeerkan lagu dhaqi maayo ciidamada, xubnaha kala duwan ee Madaxweynuhu magacaabay, marka laga reebo agaasimayaasha guud iyo xoghayayaasha fulinta ee dawladaha hoose iyo maamulka gobollada iyo qof kasta oo si ku meel gaadh ah uga hawlgala hay'adaha kala duwan ee dawladda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA LABAAD
## AASAASKA HAY'ADDA HAWLGABKA IYO XAQSIINTA SHAQAALAHA DAWLADDA

### Qodobka 5aad
### Qaabdhismeedka maamul ee hay'adda

1) Sanduuqu waxa uu yeelanayaa qaabdhismeedkan soo socda:
   b. Guddida sare ee maamulka hay'adda.
   t. Agaasimaha Guud ee Hay'adda.
   j. Waaxaha iyo shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah xil gudashadeeda.
2) Shaqaalaha sanduuqu waxa ay noqonayaan shaqaale dawladeed oo loo qaato si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda.
3) Guddida Sare ee Maamulka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Qaranku waxa ay ka koobnaanayaan xubnahan hoos ku xusan: -
   b. Wasiirka Wasaaradda Shaqagelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska.
   t. Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
   j. Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.
   x. Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
   kh. Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
4) Madaxweynaha ayaa digreeto ku magacaabaya xubnaha Guddida sare ee maamulka sanduuuqa.
5) Agaasimaha Guud ee hay'adda ayaa noqonaya xoghayaha guddida.
6) Guddidu waxa ay magacaabi karaan oo guddida ka mid noqon kara laba xubnood oo aqoon ahaan kaalmeeya muddo ay guddidu cayinto, hase yeeshee xubnahaasi wax cod ah ku yeelan maayaan arrimaha guddidu go'aanka ka gaadhayso.
7) Xubnaha guddida, waxa ka reebban in ay guddoomaan hadyad, dhaqaale ama gunno ka timid hanti-maamule, ammaana-haye, maamulaha hay'adda ama adeeg-bixiye kale oo Hay'adda Hawlgabka si uun xidhiidh ula leh.

### Qodobka 6aad
### Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Xilka iyo waajibaadka Guddida sare ee maamulka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda waxa ka mid ah:

1. In ay anisixiyaan siyaasadda iyo qorshayaasha Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta Qaranka.
2. In ay dejiyaan xeer-nidaamiyayaasha, hagayaasha, tilmaamaha iyo habraacyada hay'adda ee lagama maarmaanka u ah fulinta iyo dhaqan galinta xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. In ay ansixiyaan miisaaniyadda hay'adda, ka hor inta aan loo gudbin Wasaaradda Maaliyadda, si loogu daro miisaaniyadda qaranka.
4. In ay dejiyaan istiraatijiyadda guud iyo barnaamijyada lagu horumarinaayo Hay'adda.
5. In ay kala taliyaan Agaasimaha Guud, arrimaha maamul ee la'xidhiidha ballaadhinta iyo horumarinta adeegyada Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta.
6. In ay xaqiijiyaan in sanduuqu fuliyay waajibaadka shaqo, si waafaqsan xeerka iyo qorshaha hay'adda.
7. In ay Agaasimaha Guud ka dalbadaan inuu soo gudbiyo war-bixinnada waxqabadka iyo kuwa maaliyadeed saddexdii biloodba mar iyo mar kasta oo ay lagama maarmaan u arkaan.
8. In ay Madaxweynaha u gudbiyaan war-bixinaha iyo talooyinka muhiimka u ah horumarinta iyo taabbagalinta hay'adda.
9. In ay kormeeraan maamulka habka ururinta qaadhaanka iyo bixinta xuquuqda xeerku tilmaamay.
10. In ay go'aamiyaan raasamaalka, kharashaadka joogtada ah iyo xisaabta keydka ah ee Hay'adda Hawlgabka.
11. In ay guddoomaan, isla markaana ururiyaan qaadhaanka laga qaado shaqaalaha dawladda, oggolaadana haynta, maalgelinta, maamulka qaadhaanka iyo in la bixiyo xuquuqda hawlgab, si waafaqsan xeerkan.
12. In ay heshiis la galaan hay'adaha ama ururrada Somaliland iyo dibaddeedaba ah ee uu u arko munaasib iyo in ay wax ka tarayso gaadhista ujeeddooyinka loo aasaasay Hay'adda.
13. In ay bixiyaan tilmaamaha lagama maarmaanka ah ee ay u arkaan in lagu dhaqangalin karo xeerkan.
14. In ay ka qayb qaataan abaabulka dhaqaalaha loogu ururinayo Hay'adda.
15. In ay oggolaadaan taariikhaha bixinta xuquuqda hawlgabka, qaabka loo bixinayo iyo goobaha lagu bixinaayo.
16. In ay oggolaadaan habka, inta jeer iyo nidaamka tabarrucaadka iyo xogaha la xidhiidha loogu gudbinayo Hay'adda
17. In ay dib u eegaan, oggolaadana dakhliga Hay'adda Hawlgabka iyo kharashaadka, una gudbiyaan Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo leh oggolaanshaha kama dambaysta ah.
18. In ay dib u eegaan oggolaadana deeqaha Hay'adda iyo codsiyada kabka ah una gudbiyaan Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
19. In ay diyaariyaan oggolaadana qorshayaasha hoggaamineed ee hay'adda iyo siyaasadaha la xidhiidha barnaamijyada iyo adeegyada hay'adda.
20. In ay bixiyaan talooyinka iyo tilmaamaha kale ee sanduuqu u baahan yahay.
21. In ay la xisaabtamaan agaasimaha, kuna amraan soo gudbinta war-bixinaha maaliyadeed iyo waxqabad ee sannadlaha ah iyo mar kasta oo loo baahdo war-bixin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

22. In ay xaqiijiyaan in sanduuqu gaadho ujeeddooyinkiisa, fuliyana waajibaadkiisa iyaga oo ka duulaya mabaadii'da ka qayb galka, daahfurnaanta iyo isla'xisaabtanka.
23. Guddida Sare ee Hay'adda Hawlgabku waxa ay furayaan xisaabaadkan soo socda:-
    b. Xisaabta lagu shubo qaadhaanka shaqaalaha dawladdu ay sida billaha ah u bixiyaan.
    t. Xisaabta kharashaadka maamul ee joogtada ah ee lagu shubo miisaaniyadda Hay'adda Hawlgabka.
    j. Xisaabta hawlgabka laga bixiyo, si xeerkan waafaqsan.
    x. Xisaabta keydka.

## Qodob 7aad

## Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta

Hay'adda lagu aasaasay qodobka 5aad ee xeerku, waxay yeelanaysaa xilka iyo waajibaadka hoos ku faahfaahsan:

1. Curinta xeer-nidaamiyayaal, qorshayaal iyo halbeegyo ay guddidu ku asixin doonto go'aan guddi oo lagu gaadhay si xeerka waafaqsan, si loogu maamulo bixinta hawlgabka, xaqsiinta iyo xuquuqda kale ee la xidhiidha hawlgabka, si waafaqsan xeerkan;
2. Maamulka barnaamijyada hawlgabka shaqaalaha dawladda iyo barnaamijyada kale ee hawlgab ee lagu sheegay xeerarka kale oo dhaqangal ah.
3. Diyaarinta mabaadii'da maalgashi ee Hay'adda oo ay guddidu go'aan guddi ku ansixin doonaan, si xeerka waafaqsan.;
4. Keydinta xogta shaqaalaha, si loo sugo shaqaalaha xaqa u leh hawlgabka, kuwa hawlgabay iyo dhaxlayaasha ee ay ka tageen shaqaalaha hawlgabka xaqa u leh ee geeriyooday, sida: xogta qofka shaqaalaha ah ee hawlgabka ah lagu aqoonsanayo, lambarrada aqoonsiga, meesha uu deggan yahay, adeegga hawlgabka, faahfaahinta lagu aqoonsan karo xubnaha qoyska ee noqonaya dhaxlayaasha, dhaxalka qofka hawlgabka ah leh iyo xogaha kale ee loo baahan yahay, si loo xisaabiyo loona bixiyo xuquuqda hawlgabka, si waafaqsan xeerarka Somaliland ee dhaqangalka ah.
5. Gelidda heshiisyo: iib, kiro iyo ijaaridda hantida muuqata ee lagama maarmaanka u ah ilaalinta hay'adda.
6. Gelidda heshiisyada lala galayo maamulayaasha hantida, ammaano hayayaasha, xeeldheereyaasha hawlgabka, xisaabiyayaasha, hantidhawrayaasha iyo adeeg-bixiyayaasha kale ee muhiimka ah.
7. Gudbinta wacyigalinta ku saabsan sidii shaqaalaha dawladda xuquuqdooda hawlgab loo ilaalin lahaa; shaqaalaha hawlgabka ku jira, dadka hawlgabka ah iyo dhaxlaha ama dhaxlayaasha hawlgabka ah.
8. Horumarinta, sidii kor loogu qaadi lahaa adeegyada hawlgab.
9. Fulinta awoodaha lagama maarmaanka u ah ujeeddooyinka hay'adda loo aasaasay.
10. Iyo fulinta awoodaha kale ee xeer kale oo dhaqangal ah loogu jideeyo.

## Qodobka 8aad
## Ujeeddada hay'adda

Ujeeddoonka hay'adda loo aasaasayo waxa ka mid ah: -

1. In la helo sanduuq-xisaabeed lagu keydiyo, isla markaana lagu maamulayo xisaabaha qaadhaanka hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda.
2. In uu qabto, isla markaana fuliyo shaqooyinka maamul iyo bixinta lacagaha hawlgabka iyo xaqsiinta.
3. In uu xaqiijiyo maalgashiga iyo ilaalinta hantida hawlgabka, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee qaranka.
4. Nidaamka xisaabeed e sanduuqu wuu ka madaxbannaan yahay nidaamka xisaabeed ee hay'adda lagu aasaasay xeerkan.

## Qodobka 9aad
## Xilka iyo waajibaadka hay'adda

Sanduuqu wuxuu gudanayaa xilkan iyo waajibaadyadan soo socda: -

1. Xisaabinta, xaqiijinta iyo bixinta xuquuqaha halwgabka, xaqsiinta shaqaalaha dawladda iyo gaadhsiinta dadka dhaxalkooda leh, si waafaqsan xeerka.
2. Go'aaminta in qof kasta oo shaqaale dawladeed ahi helo xaqiisa hawlgab, marka uu xaqaasi sugnaado iyada oo lagu salaynayo xogaha rasmiga ah ee laga hayo qofka shaqaalaha ah.
3. Wuxuu kor u qaadayaa, isla markaana xaqiijinayaa sugidda nidaamka hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda ee gaadhay muddada hawlgabka ama xaqsiinta iyo sidii loo hawlgelin lahaa, isla markaana looga faa'iidaysan lahaa cududda shaqaale cusub oo si xeerkan waafaqsan oo loo qaadanayo, si loogu beddelo shaqaalaha hawlgabkooda la xaqiijiyay ee helay xaqa hawlgabka.

## Qodobka 10aad
## Awood bixinta wakiilashada

1. Guddidu awoodaha dejinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo xeer-nidaamiyayaasha ee lagu sheegay qodobka 9aad ee xeerkan, waxa uu u wakiilan karaa agaasimaha fulinta hay'adda, sarkaal kale ama shaqaalaha guddida, haddii aanu agaasimuhu joogin.
2. Awoodaha guddida ee la'xidhiidha qabashada war-bixinaha, baadhitaannada maaliyadeed iyo dib u eegista warbixinnadaas cidna uma wakiilan karaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 11aad

## Shakhsiyadda qaanuuniga ah iyo shaambadda

1. Sanduuqu waxa uu noqonayaa hay'ad madaxbannaan oo leh sharciyad qaanuuni ah, waxaanuu magaciisa ku gali karaa heshiis kasta, iyada oo magaciisa uu wax ku dacwayn karo, laguna dacwayn karo.
2. Sanduuqu waxa uu yeelanayaa shaambad gaar ah, taas oo qoraal kasta oo lagu dhufto loo aqoonsanayo mid rasmi ah.

## Qodobka 12aad

## Kulannada guddida iyo go'aannadooda

1. Guddidu waxay yeelanayaan kulamo caadiya iyo kuwo aan caadi ahayn.
2. Kulamada caadiga ah ee guddidu waxay qabsoomayaan saddexdii biloodba hal mar. Kulannada aan caadiga ahayn waxay qabsoomi karaan mar kasta oo loo baahdo, waxaana soo jeedin kara guddoomiyaha ama 5 xubnood oo kale ugu yaraan.
3. Guddoomiyaha guddidu waa in uu gaadhsiiyaa muddada qabsoomidda kulanka toddoba cisho ka hor xubnaha guddida, maalinta qabsoomidda fadhiga.
4. Kulamada guddidu waxa uu ku qabsoomayaa marka ay joogaan ugu yaraan afar (4) xubnood.
5. Go'aannada guddidu, waxay ku ansaxayaan haldheeri xubnaha jooga, haddii tirada codadku isle'ekaadaan, guddoomiyaha ayaa leh cod dheeraad ah (casting vote).

## Qodobka 13aad

## Guddi-hoosaadyada guddida

1. Guddidu waxa ay dhexdooda ka sii samaysan karaan guddi hoosaadyo ka kooban xubno kala duwan oo u xilsaaran shaqo gaar ah oo uu guddidu cayinto.
2. Guddidu waxa ay ku dari karaan xubno aan guddida ka tirsanayn guddi-hoosaadyada lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkan sababo gaar ah awgeed, muddada uu xubinta ka ahaanayanna guddida ayaa go'aaaminaysa.
3. Iyada oo u hoggaansamaysa tilmaamaha guud ama kuwa gaarka ah ee guddida, guddi-hoosaadka loo dhisay si waafaqsan qodobkani waxa ay dejisan kartaa habraac shaqo fulineed.

## Qodobka 14aad

## Ka fogaanshaha danaha is khilaafsan

1. Dhammaan xubnaha guddida, waxa waajib ku ah in ay arrin kasta oo u muuqata dano is khilaafsan, taasi oo si toos ah ama si dadban isaga ama ehelkiisu si uun ugu lug yeelan karaan in aanay ku dhaqmayn.
2. Haddii, xubintu caddayso in arrinta laga hadlayaa si uun u saamaynayso, guddida ayaa go'aan ka gaaadhaya, in xubintaasi kulanka ka qaybgasho iyo in kale, hase yeeshee xataa



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

haddii loo oggolaado ka qaybgalka kulanka, cod kuma yeelanayo go'aan kasta oo arrintaas khuseeya.

3. Xubin kasta oo si badheedh ah iyo si qarsoonba ula timaadda danaha lagu sheegay qodobkan kor ku xusan, waxay ka hor timid mabaadii'da xeerkan.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## NIDAAMKA MAAMULKA HANTIDA IYO MAALIYADDA HAY'ADDA

### Qodobka 15aad
### Miisaaniyadda Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa qoondo miisaaniyadeed oo uu ansixiyo Golaha Wakiillada oo ka mid ah miisaaniyadda qaranka, taas oo laga bixin doono dhammaan lacagaha lagu daboolayo kharashaadka ay gasho, si uu u fuliyo hawlihiisa iyo waajibaadyadiisa shaqo ee uu xeerkani dhigayo.
2. Hay'addu waxa ay miisaaniyaddeeda sannadlaha ah u gudbinaysaa Wasiirka Maaliyadda, marka uu soo saaro wareegtada soo gudbinta miisaniyad sannadeedka.
3. Miisaaniyadda sannadlaha ahi waxa ay ka koobnaanaysaa:

   b. Faahfaahinta dakhliga iyo kharashaadka xafiiska, lana soo waafajiyay habraaca ay wasaaraddu dejiso.

   t. Faahfaahinta qaab-dhismeedka shaqaalaha iyo saraakiisha hay'adda.

   j. Qorshayaasha horumarinta xafiiska ee sannadlaha ah.

   x. Xog kasta oo kale oo Wasiirka Maaliyaddu si gaar ah u tilmaamo, in lagu soo daro Miisaaniyadda.

### Qodobka 16aad
### Awoodda deyn qaadashada

1. Hay'addu marka ay hesho ogolaanshaha Wasiirka Maaliyadda, waxay deyn ka qaadan kartaa bangiyada iyo hay'addaha kale ee maaliyadeed ee dalka gudihiisa damaanad iyo damaanad la'aan, si uu waajibaadkiisa uga soo baxo una fuliyo shaqooyinka, si waafaqsan qodobbada xeerkan.
2. Awoodda deyn qaadashada hay'adda ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa in aan la fulin illaa wasiirka loo gudbiyo qorshe muujinaya.

   b. Xaddiga iyo faahfaahinta qorshaha deynta.

   t. Ujeeddada lacagta la amaahanayo loo isticmaalayo .

   j. Qaabka deynta lagu bixinayo hadhaw iyo

   x. Dhammaan wixii xog dheeraad ah ee uu u baahdo Madaxweynuhu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu dammaanad qaadayaa bixinta deynta ay qaadanayso, xafiisku si uu u fuliyo waajibaadkiisa shaqo marka Madaxweynuhu ogolaado, si waafaqsan qodobbada xeerkan.
4. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu siin karaa xafiiska kab, deeq ama dayn marka uu Madaxweynuhu ogolaado, haddii kabkan, deeqdan ama dayntani muhiim u tahay fulinta shaqooyinka xafiiska.

## Qodobka 17aad
## War-bixinaha Xisaabaadka

1. Sannad maaliyadeedka xafiisku, waxa uu bilaabmayaa 1-da January waxaanu dhammaanayaa 31-ka December ee isla sannadka, sida ku xusan Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr.75/2016.
2. Hay'addu, waa inay raacdaa nidaam xisaabeedka ay dejisay Wasaaradda Maaliyaddu ee xafiiska Xisaabiyaha Guud, loona raacay Xeerarka Maamulka Maaliyadda Qaranka, sidoo kalena yeeshaa diiwaannada dhammaan macaamilkiisa iyo arrimihiisa maaliyadeed, waana in uu samaystaa wax kasta oo lagama maarmaan u ah in uu xaqiijiyo in dhammaan lacag bixinihiisa loo sameeyay loona amray si habboon iyo in si ku filan loo ilaaliyay hantida hay'addu gacanta ku hayso iyo kharashaadka ay gashay.
3. Dhammaan war-bixinaha maaliyadeed waa in ay noqdaan kuwo waafaqsan halbeegyada war-bixinaha maaliyadeed ee caalamiga ah iyo kuwo dalka u dejisan ee uu faahfaahinayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka Xeer Lr.75/2016.
4. War-bixinaha maaliyadeed ee sannad kastaa waa in ay noqdaan kuwo ka turjuma xaaladda maaliyadeed ee dhabta ah ee xafiiska iyo natiijooyinka shaqadii xafiiska ee sannadkaas.

## Qodobka 18aad
## Xisaabaadka iyo Diiwaannada

1. Hay'addu waxay diyaarin doontaa buug iyo diiwaan xisaabeedyo ku habboon, in si dhammaystiran loo geliyo oo loogu keydiyo xog xisaabeedka la'xidhiidha dhamman hawlaha iyo hantida xafiiska.
2. Hay'addu waxay siinaysaa hay'adaha ay khusayso xisaab celinaha, xisaabaadka iyo xogaha kale ee khuseeya hawlaha xafiiska.

## Qodobka 19aad
## Hanti-dhawridda

1. Hay'adda, waa in uu seddex bilood kasta u gudbiyaa warbixin maaliyadeed, Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Hanti-dhawrka Guud.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Hay'adda, laba bilood kaddib dhammaadka sannad maaliyadeedka waxa uu u gudbinayaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawrka Guud warbixin maaliyadeedkii sannadkii dhammaaday.
3. Hantidhawraha Guud waxaa uu si sannadle ah u baadhayaa xisaabaadka xafiiska, sidoo kale wuxuu baadhi karaa mar kasta oo loo baahdo.
4. Dhammaan saraakiisha iyo shaqaalaha hay'addu waxa ay u ogolaanayaan hanti-dhawraha dhammaan buugaagta, qoraallada, heshiisyada, xisaabaadka, foojarrada iyo qoraallada kale ee hantidhawruhu muhiimka u arko ee la'xidhiidha baadhista warbixinaha maaliyadeed ee xafiiska, waxaanu hantidhawruhu ka dalban karaa qofka masuulka ka ah qoraalladan, in uu ka jawaabo wixii su'aalo ah ee la'xidhiidha iyo inuu ka saxeexo warbixinta arrintaas la'xidhiidha, waxa kale oo uu qofkaa weydiin karaa hantidhawruhu wixii kale ee xog ah ee uu muhiim u arko.
5. Hantidhawraha Guud, waa inuu warbixintiisa ku sheegaa:
   b. In warbixinaha maaliyadeed loo diyaariyay, si waafaqsan halbeegayada warbixinaha maaliyadeed ee caalamiga ah iyo halbeegyada dalka u dejisan iyo in ay si caddaalad ah u muujiyaan macaamilka maaliyadeed ee hay'adda.
   t. In nidaam xisaabeedka xafiiska iyo hantida kale ee xafiiska loo keydiyey loona xafiday, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.
6. Nuqul ka mid ah warbixinaha maaliyadeed ee la baadhay iyo warbixin kasta oo uu sameeyay hantidhawraha baadhista sameeyay, waxa loo gudbinayaa Madaxweynaha, sidoo kalena iyada oo lagu daraayo warbixinta sannadlaha ah ee Hantidhawruhu u gudbiyo Golaha Wakiillada.

### Qodobka 20aad
### Nidaamka qandaraas bixinta hay'adda:

Iyada oo aan waxba loo dhimayn nidaamka qandaraas bixinta ee qaranku leeyahay ee ku xusan Xeerka Qandaraasyada Qaranka, hay'addu waxay qandaraas ku bixin kartaa qalab, agab ama adeeg si dhakhso ah loogu baahan yahay, isla markaana farsamo ahaan iyo tayo ahaanba u baahan in si gaar ah loo ilaaliyo.

## CUTUBKA AFRAAD
## MAAMULKA IYO MAARAYNTA HAY'ADDA HAWLGABKA

### Qodobka 21aad
### Magacaabista agaasimaha guud ee hay'adda:

Agaasimaha Guud ee Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta waxa magacaabaya, isla markaana xilka ka qaadi kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, isaga oo la tashanaya guddida sare ee hay'adda, si waafaqsan qodobka 90aad faqraddiisa 3aad xarafka (sh) ee Dastuurka JSL.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 22[aad]

## Shuruudaha qofka noqonaya agaasimaha

1) Qofka noqonaya agaasimaha Hay'adda Hawlgabka, waa inuu buuxiyo shuruudahan soo socda:-

b. Inuu yahay muwaaddin Somaliland u dhashay.

t. Inuu yahay muslim, asluub, xilkas & akhlaaq wanaagsan bulshada ku dhex leh, isla markaana leeyahay sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

j. In aanay da'adiisu ka yaraan 35 sannadood.

x. Inuu maskax ahaan caafimaad qabo.

Kh. Inuu haysto shahaado jaamaceed oo la aqoonsan yahay, ugu yaraanna haysto heerka koowaad ee jaamacadda, bartayna siyaasadda, arrimaha bulshada, maamulka iyo maaraynta, maamulka maaliyadda ama culuun kale oo kasta oo la'xidhiidha shaqada hawlgabka iyo xaqsiinta.

d. Inuu leeyahay waayo'aragnimo shaqo oo aan ka yarayn **toddoba (7) sanno** kana soo shaqeeyay arrimaha hawlgabka ama maamulka hay'ado maaliyadeed.

r. In aan lagu helin dembi la'xidhiidha xatooyo iyo khiyaano shantii sanno ee ugu dambeeyay.

s. Inuu yahay qof ku sifoobay xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan, isla markaana leeyahay sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

## Qodobka 23[aad]

## Xilka iyo waajibaadka agaasimaha guud ee hay'adda:

1) Xilka iyo waajibaadka shaqo ee Agaasimaha Guud ee Hay'adda Hawlgabka waxa mid ah: -

b. Waa madaxa fulinta ee masuulka ka ah hawlaha maalinlaha ah ee Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta, waana masuulka ugu sarreeya maaraynta hawl-maalmeedka hay'adda.

t. Waxa uu matalaa kuna hadlaa magaca Hay'adda Hawlgabka iyo Xaqsiinta, sidoo kalana waxa uu cid u igman karaa ku hadalka magaca hay'adda.

j. Waxa uu qorsheeyaa, kormeeraa isla markaana dabagalaa shaqooyinka hay'adda, si waafaqsan siyaasadda xukuumadda iyo qorshaha hay'adda.

x. Waxa uu diyaariyaa, isla markaana soo bandhigaa qorshayaasha iyo barnaamijyada horumarineed ee hay'adda.

kh. Waxa uu kormeeraa isla markaana dabagala shaqooyinka waaxaha iyo qaybaha xafiiska hay'adda.

d. Waxa uu masuul ka yahay ururinta qaadhaanka hawlgabka ee laga qaadayo dawladda iyo shaqaalaha dawladda.

r. Waxa uu ku baraarujinayaa shaqaalaha dawladda bixinta qaadhaanka billaha ah ee laga jaro.

s. Waxa uu ilaalinayaa diiwaannada adeegyada hawlgabka, waxaanu xisaabinayaa adeegyadii hore iyo kuwa mustaqbalka, si xeerka waafaqsan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

sh. Waxa uu noqonayaa xoghaynta guddida sare ee maamulka, hase yeeshee cod ma laha

dh. Waxa uu bixinayaa taageerada adeeg ee ay u baahdaan shaqaalaha dawladda, hawlgabka, dhaxlaha dhaxalka hawlgabka leh, adeegyadaas oo ay ku jiraan kuwa ku saabsan helidda diiwaannada qaadhaanka iyo adeegyada hawlgabka.

c. Waxa uu guddoominayaa shirarka shaqaalaha hay'adda xuquuqda hawlgabka, si waafaqsan qodobbada xeerkan.

g. Waxa uu ilaalinayaa xisaabaadka maaliyadeed ee Hay'adda Hawlgabka.

f. Waxa uu diyaarinayaa warbixinaha sannadlaha ah iyo miisaaniyad sannadeedka hay'adda.

q. Shaqooyinka kale ee lagama maarmaanka u ah shaqada hay'adda ee uu guddidu u igmado.

2) Agaasimuhu waxa uu xaqiijinayaa in xisaabta keydka maalgalin loogu sameeyo, si ay ku jirto danta Hay'adda Hawlgabku, iyada oo si cad guddidu u qeexayso dhammaan waxyaabaha muhiimka u ah maalgashigaas, laguna sheegay miisaaniyadda hay'adda.

3) Agaasimuhu waxa uu u soo bandhigayaa guddida siyasadaha, xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada iyo hagayaasha la'xidhiidha codsiyada hawlgabka iyo bixinta xuquuqda hawlgabka si ay u ansixiyaan.

4) Agaasimuhu waxa uu diiwaannada Hay'adda Hawlgabka la'wadaagayaa hantidhawraha gudaha, waxaanu farayaa dhammaan shaqaalaha hay'adda in ay ka jawaabaan su'aalaha hantidhawrka.

5) Hantidhawrka guduhu wuu ka madax-banaanaanayaa agaasimaha, waxaanu toos u hoos tegayaa guddida.

6) Iyada oo la raacayo oggolaanshaha guddida, agaasimuhu waxa uu Hay'adda shaqaalaha Dawladda ka codsanayaa shaqaalaysiinta shaqaalaha muhiimka u ah fulinta shaqada Hay'adda Hawlgabka, si waafaqasan xeerka shaqaalaha dawladda.

7) Agaasimuhu waxa uu saxeexayaa lana soconayaa dhammaan dhaqdhaqaaqa maaliyadeed, diiwaannada, warbxinaha waxqabad iyo warbixinaha maaliyadeed.

8) Waxa uu hay'adda ku metelayaa shirarka.

9) Waxa kale oo uu qabanayaa waajibaadka ama shaqooyinka kale ee guddidu u wakiisho.

## Qodobka 24[aad]

## Maalgashiga Hay'adda Hawlgabka:

1. Hantida hawlgabka waxa maalgashi loogu samayn karaa, si feejignaan leh oo waafaqsan mabaadii'da hay'adda, waxaana maalgashigaa loo samaynayaa, si waafaqsan danta khaaska ah ee shaqaalaha dawladda iyo dadka hawlgabka xaqa u leh, isla markaana waafaqsan shuruudaha xeerkani tilmaamay.

2. Guddidu waxa ay soo saarayaan siyaasad maalgashi oo si habboon looga baaraandegey, waafaqsanna mabaadii'da xeerkan lagu sheegay, taas oo tilmaamaysa waxyaabahan: -

   b. Noocyada lacagaha la maalgalinayo, heerarka khatareed ee la aqbali karo ee lagu go'aamin karo hantida hawlgab ee la'maalgalinayo ama aan la maalgalinayn.

   t. Dhinacyada masuulka ka ah qaadashada go'aannada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

j. Habraacyada loo marayo go'aan qaadashada.

x. Habraacyada lagu ogaanayo, kormeerayo laguna maareynayo khataraha maalgashi ee suurtagalka ah.

kh. Habka lagula soconayo in maamulayaasha sanduuqu u hoggaansameen siyaasadda maalgashi iyo

d. Qodobbada kale ee guddidu u aragto lagama maarmaan.

2) Guddidu waxa ay u soo bandhigayaan siyaasadda maalgashiga hawlgabka shaqaalaha dawladda, si waafaqsan xeerarka dalka.

3) Guddidu waxa ay warbixinaha maalgashi la'wadaagayaan Madaxweynaha iyo ciddii kale ee ay guddidu u aragto lagama maarmaan.

4) Hantida hawlgabka waxa lagu maalgalinayaa hantidan soo socota:-

b. Lacagaha deynta ah ee dawladda Somaliland ee la'dammaanad qaaday, isla markaana leh muddo sugan oo lagu soo celinayo.

t. Lacagaha la dhigo Bangiga Dhexe.

j. Hantida kale ee maaliyadeed ee lagu kala ganacsado suuqyada raasamaalka dhisan, lana qiimeyn karo marka loo baahdo xisaab celinta maalgashi.

5) Lacagaha maxalliga ah ee la oggolyahay waxa ka mid ah:

b. Xisaabaadka Bangiga Dhexe iyo lacagaha la dhigo Bangiga Dhexe ee ay hayaan hay'adaha ruqsadda ka haysta Bangiga Dhexe, kuwaas oo aanay ku socon amarro fulineed ama aan liisankooda la xayirin.

t. Damaanadaha ay dawladdu soo saartay illaa inta la dammaanad qaaday.

6) Lacagaha caalamiga ah ee la oggolyahay waa in lagu soo saaro awood caalami ah oo la aqoonsan yahay, lehna bangiyo nidaamsan, raasamaal ama suuqyo maaliyadeed oo kale, waxaana ka mid ah:-

b. Lacagaha dhigaalka ah ee hay'adaha haysta qiimaynta ugu sarraysa, qiimaynta maalgashiga amaahda ah, qiimayntaas oo ay sameeyeen ugu yaraan laba ka mid ah shirkadaha ugu sumcadda wanaagsan, shirakadaha caalamiga ah ee wax qiimeeya.

t. Damaanadaha ay dawladuhu soo bandhigaan, illaa xadka dalka ay khusaysaa damaaanad qaadi karo, lacagaha deynta ah iyo soo saaruhuba haystaan qiimaynta lagu xusay xarafka sare.

j. Damaanadaha ka diiwaangashan jaangooyaha suuqyada raasamaalka ee u furan dadweynaha ama sarrifka suuqa la aqoonsan yahay oo ay shardi tahay in jaangooyaha suuqyada raasmaalka ee uu khuseeyaa kormeero.

x. Lacagaha maalgashi ee la wada leeyahay waxa shardi ah, in uu oggolaado jaangooyaha habboon ee la aasaasay.

7) Hantida hawlgabka laguma maalgashan karo hantidan soo socta:

b. Damaanadaha aan ku jirin liiska sarrifka suuqa ama aan si guud looga ganacsan.

t. Hantida aan la iibin, la iibin karin ama aanu xeer si kale u reebin.

j. Hantida maguurtada ah.

x. Hantida muuqata ee aan ku jirin suuqyada sugan ee aan qiimaheeda la ogayn, sida alaabta qadiimiga ah, shaqada farshaxanka, lacagta qaddaadiicda ah iyo baabuurta.



KAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

kh. Hanti kasta ama dammaanad kasta oo uu bixiyo guddida, agaasimaha, ammaano-hayaha ama hay'ado uu xidhiidh ka dhaxeeyo ama qaraabadooda iyo

d. Wixii hanti kale ah ee uu Bangiga Dhexe sheego in aan la maalgelin karin.

8) Hantida hawlgabka ma iibsan karaan, lagamana iibin karo xubnaha guddida, agaasimaha, amaano-hayaha ama hay'adaha ay xidhiidhka la'leeyihiin iyaga ama qoysaskoodu.

## Qodobka 25aad

## Magacaabista iyo shaqooyinka ammaano-hayaha

1. Haddii, hantida hawlgabka lagu sameeyo maalgashi, si waafaqsan qodobka 18aad, Guddidu waxa ay magacaabayaan ammaano-hayaha Hay'adda.
2. Ammaano-hayuhu waxa uu:

b. Masuul ka noqonayaa hantida laga maalgeliyay hawlgabka, isaga oo ku haynaya hantida la'maageliyay nidaam aammin ah oo laysla waafaqay oo guddida sare kalsooni ku qabto.

t. Xafidayaa buugaagta xisaabaadka iyo dhammaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee hantida ama barnaamijyada sanduuqu maalgaliyay.

j. Warbixin ka siinayaa agaasimaha iyo guddida sare arrimaha la'xidhiidha hantida uu hayo markasta oo guddidu go'aamiso, in warbixin laga keeno.

x. Fulinayaa tirakoobka maalgashiga iyo xisaab celinaha maalgashiga ee uu u hayo Hay'adda Hawlgabka, waxaanu xog iyo macluumaad ka siinayaa agaasimaha bil walba iyo guddida ugu yaraan saddexdii biloodba mar.

kh. Fulinayaa isaga oo guddida metelaya wixii uu iyaga wakiil uga yahay ee la xidhiidha u codaynta arrimaha maalgashiga.

## Qodobka 26aad:

## Waajibaadka daryeelka

Agaasimaha hay'adda iyo ammaana-hayuhu waxa ay:

b. Xaqiijinayaan in hantida Hay'adda Hawlgabka loo maamulo ama loo hayo, si waafaqsan qodobbada xeerkan, xeer-nidaamiyayaasha ama hagayaasha ka dheegma.

t. Qaadayaan tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu xaqiijinayo, in maamulka Hay'adda Hawlgabka loo fuliyo keliya sida ay danta shaqaalaha dawladda, hawlgabka iyo dhaxlayaasha hawlgabku ku jirto.

j. Sida ugu dhakhsaha badan ugu wargelinayaan guddida wixii ay u arkaan, in ay waxyeelayso xuquuqaha mulkiilaha xisaabta dhitaysan ee hawlgabka.

x. Sida ugu dhakhsaha badan ugu wargelinayaan guddida, haddii dawladdu bixin waydo qaybta ay tahay in ay bixiso ee lacagaha hawlgabka, lacag taasina ay habsaanto toban (10) maalin shaqo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 27aad
## Kharashaadka maamul ee hay'adda hawlgabka

Guddidu waxa ay furi doonaan xisaab laga bixiyo: -

1. Deeqaha bilowga ah ee ah lacagta ay bixisay dawladdu, kuna bixisay kharashaadka guddidu ku gashay fulinta awoodaheeda iyo shaqooyinka xeerkani siiyay.
2. Kharashaadka maamul ee sannadlaha ah ee lagu sheegay miisaaniyadda sannadlaha ah ee Hay'adda Hawlgabka.
3. Lacagaha kale ama hantida laga yaabo in la galo marka guddidu fulinayso awoodaheeda.
4. lacagaha laga helo ilaha kale ee dakhli loogu deeqay ama la siiyo Hay'adda.

## Qodobka 28aad
## Xisaabta Keydka ah:

1) Sanduuqu waxa uu yeelanayaa xisaab keyd ah, taas oo lagu shubi doono lacagaha keydka ah ee loogu talagalay isdhinka dhaqaale ee yimaadda iyo xaaladaha degdegga ah iyo:
    b. Qaadhaanka dheeraadka ah ee dawladdu siiso Hay'adda Hawlgabka ee aan ku baxayn xuquuqda hawlgab ee sannad maaliyadeedka.
    t. Waxa shardi ah in aan wax lacag ah laga saarin xisaabta keydka ah, illaa ay guddidu oggolaadaan.
2) Wixii lacag ah ee la dhigo xisaabta keydka ah waxa laga soo qaadayaa in ay qayb ka tahay xisaabta keydsan ee Hay'adda Hawlgabka.
3) Ereyga dheeraad (ama isdhin) waxa lagu qiyaasayaa inta dakhliga dawladdu kordhay ama uu hoos uga dhacay wadarta kharashaadka, waxaanay noqonaysaa dheeraad kaddib marka laga bixiyo dhammaan xuquuqaha, si waafaqsan xeerka.
4) Guddidu wixii lacag ah ee dheeraad ah waxa ay ku shubayaan xisaabta keydka ah.

## Qodobka 29aad
## Maalgelinta xisaabta keydka

1) Guddidu waxa ay maalgelin ku samayn karaan dhaqaalaha dheeraadka ah ee lagu hayo xisaabta keydka ee loo furay, si waafaqsan xeerkan.
2) Guddidu waxa ay ku shubi karaan Bangiga Dhexe ama bangiyada kale ee ay go'aamiyaan, wixii lacag ah ee ay ku hayaan xisaabaadka loo furay, si xeerkan waafaqsan ee aan loogu baahnayn socodsiinta hawlaha maamul ee hay'adda.
3) Waxa shardi ah in aan wax lacag ah laga saarin xisaabaadka keydka ama lacagta dheeraadka ah haddii aanay guddidu oggolaan.
4) Xisaabaadka keydka waxa loo maalgalinayaa, si waafaqsan siyaasadda lacagaha keydsan ee uu dejiyay Hay'adda Hawlgabku.
5) Lacag kasta oo la go'aamiyo, in lagu shubo xisaabta keydka, waxa laga soo qaadayaa in ay qayb ka tahay xisaabta keydka ah ee hay'adda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 30aad

## Sannad maaliyadeed

Sannad maaliyadeedka sanduuqu waxa uu noqonayaa: muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo ku dhammaada 31-ka bisha December sannad kasta.

## Qodobka 31aad

## Sannad miisaaniyadeed

1) Inta aanu bilaabmin sannad maaliyadeedku, guddidu waxa ay diyaarinayaan miisaaniyad sannadeed odorasaya (i) dakhliga iyo kharashaadka barnaamijka Hay'adda Hawlgabka (ii) kharashaadka maamul ee Hay'adda Hawlgabka.
2) Miisaaniyad sannadeedka waxa la diyaarinayaa ugu yaraan saddex bilood ka hor bilowga sannad maaliyadeedka, waxaana loo gudbinayaa guddida si ay u ansixiyaan. Guddidu marka ay ansixiyaan, ayuu wasiirka maaliyaddu miisaaniyad sannadeedka qaranka ku daraya, sidoo kalena gaynayaa Golaha Wakiillada.
3) Miisaaniyadda sannadlaha ahi waxa ay odorasaysaa dhammaan kharashaadka maamul ee hay'adda ee sannad maaliyadeedka, waxaanay sheegaysaa: -

    b. Bixinta mushaharaadka, gunnooyinka iyo lacagaha kale ee la'xidhiidha xuquuqda hawlgab ee shaqaalaha Hay'adda Hawlgabka.

    t. Bixinta xaqa hawlgabka, xaqa shaqo ee ururay iyo lacagaha kale ee la'xidhiidha xuquuqda hawlgab ee shaqaalaha Hay'adda Hawlgabka.

    j. Kirooyinka dhismayaasha Hay'adda Hawlgabka, haddii aanay dhismayaashaas dawladdu bixin.

    x. Hagaajinta iyo dayactirka dhismayaasha Hay'adda Hawlgabka, haddii sanduuqu leeyahay.

    kh. Agabka muhiimka ah, tiknoolajiyadda, softiweerrada iyo hantida kale ee muhiimka u ah hay'adda iyo

    R. Kharashaadka kale ee maamul.

4) Miisaaniyad sannadeedka Hay'adda ayaa laga bixinayaa dhammaan kharashaadka iyo xuquuqda hawlgab ee uu bixinayo sanduuqu.
5) Wax kharashaad ah oo aan waafaqsanayn miisaaniyadda sannadlaha ah ee la'ansixiyay lama geli karo.
6) Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland ayaa bixinaysa wixii isdhin dhaqaale ah, siinaysana Hay'adda Hawlgabka, haddii lacagta caddaanka ah ee ku jirta xisaabta Hay'adda Hawlgabka uga furan Bangiga Dhexe ay ka yaraato lacagaha miisaaniyadda ku jira ee hawlgabka iyo gunnooyinka. Sanduuqu waa inuu Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ogaysiiyo, haddii uu dareemo in aanay lacagtiisu ku filnayn.

## Qodobka 32aad

## Diiwaannada, xisaabaadka iyo Hantidhawrka

1) Guddidu waxa ay amrayaan in la ilaaliyo lana keydiyo dhammaan buugaagta iyo diiwaannada xisaabeed ee dakhliga, kharashka iyo hantida Hay'adda Hawlgabka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Guddidu waxa ay amrayaan in la diyaariyo xisaabaadka Hay'adda, si uu baadhitaan ugu sameeyo Hantidhawraha Guud ee Qaranku, si sannadle ah.
3) Guddidu waxa ay warbixin sannadle ah u gudbinayaan Madaxweynaha, taas oo ka kooban warbixinta hantidhawrka ee sannadlaha ah iyo wixii kale ee xog ah ee uu Madaxweynuhu u baahdo.
4) Iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobbada sare, guddidu waxa ay magacaabayaan hantidhawr gudaha ah oo ka madaxbannaan agaasimaha hay'adda, si toos ahna warbixinaha u siiya guddida.

## Qodobka 33aad
## Qiimaynta Hawlgabka

1) Hay'adda Hawlgabka, waxa la qiimaynayaa shantii (5) sannadoodba mar, waxaana qiimayn ku samaynaya khabiir uu guddidu magacaabo.
2) Khabiirka uu guddidu magacaabay, si waafaqsan faqradda 1aad waxa uu:-
   b. Diyaarinayaa warbixinta xaaladda hay'adda iyo
   t. Wixii tallaabooyin ah ee ay muhiim tahay in la qaado.

3) Khabiirku wabixinta lagu sheegay faqradda 2aad waxa uu u gudbinayaa guddida.
4) Guddidu marka ay warbixinta iyo talo soo jeedinta khabiirka hesho, muddo bil gudaheed ah ayay ugu gudbinayaan Madaxweynaha.

# CUTUBKA SHANAAD
# SHAQADA AMA ADEEGYADA XAQA HAWLGABKA LEH, QAADHAANKA HAWLGABKA IYO BIXINTA HAWLGABKA

## Qodobka 34aad
## Shaqada ama adeegyada xaqa hawlgabka leh

Muddada shaqada ama muddada adeegga hawlgabka leh ee shaqaalaha dawladda, waxa laga xisaabinayaa muddada uu shaqaynaayay, iyada oo laga soo bilaabayo markii shaqada la qoray.

## Qodobka 35aad
## Dib ugu magacaabista shaqaalaha dawladda ee adeeg hawlgab leh

1) Haddii ay dhacdo in qof shaqaale ah oo shaqada laga saaray, xaq hawlgabna leh dib loogu magacaabo shaqada dawladda, xaqiisii hore waxa loogu darayaa midka xaqa hawlgab ee shaqada danbe, waase haddii aanu xaqiisa hore ee hawlgab qaadan.
2) Haddii qofka shaqaalaha ah ee dib loo magacaabay loo diyaariyay xaqiisii hawlgabka, Hay'adda Hawlgabku way joojinaysaa bixinta xaqaas.
3) Qofka shaqaalaha ahi, waxa uu wadanayaa shaqadiisaas xaqa hawlgabka leh ilaa uu ka hawlgabayo, markaas oo Hay'adda Hawlgabku isugu gaynayso xaqiisa hawlgabka ee labada xilli shaqo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 36aad

## Qaadhaanka Hawlgabka

1) Qof kasta oo shaqaale dawladeed ahi waxa uu Hay'adda Hawlgabka ku darayaa boqolkiiba shan (5%), kaas oo si bille ah mushaharkiisa aasaasiga ah looga jarayo.
2) Dawladdu waxa ay qof kasta oo shaqaale ah ugu daraysaa, si bille ah **boqolkiiba Shan (5%)** mushaharkiisa aasaasiga ah Hay'adda Hawlgabka.
3) Lacagta 5% ah ee shaqaalaha iyo dawladdu ku bixinayaan Hay'adda Hawlgabka sida ku cad faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan, waxa laga bilaabayaa bisha ugu horraysa ee uu qofka shaqaalaha ahi shaqada bilaabo, waxaanay joogsanaysaa marka qofka shaqaalanimadiisu dhammaato, si xeerka waafaqsan.
4) Qof kasta oo shaqaale dawladeed ah oo shaqada ku sii jiray ka hor intaan xeerkani soo bixin, lacagta boqolkiiba shanta ah (5%) ee uu Hay'adda Hawlgabka ku darayo ee looga jarayo mushaharkiisa sida billaha ah, waxay ka bilaabmaysaa marka uu xeerkani dhaqangalo, waxaanay soconaysaa illaa inta ay shaqaalayntiisu joogsanayso ama ay dhammanayso, si xeerka waafaqsan.
5) Qaadhaanka dawladda iyo shaqaaluhu bixiyaan ee Hay'adda Hawlgabka, si kala gooni ah ayaa loogu keydinayaa xaashida mushaharka lagu bixiyo ee shaqaalaha, iyada oo nuqul la siinayo qofka shaqaalaha ah, luguna siinayo hannaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu dejisay.
6) Xogta loo keydiyay, si waafaqsan faqradda 4aad ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Hay'adda Hawlgabka, si waafaqsan xeerkan.
7) Markasta oo dib u qiimayn lagu samaynayo Hay'adda Hawlgabka, xaddiga qaadhaanka ah ee shaqaalaha ama dawladdu bixinaysana dib ayaa loo qiimaynayaa, si loo xaqiijiyo in Hay'adda Hawlgabku dhaqaale ahaan u noqoto mid isku filan.
8) Haddii khabiirka qiimayntu ku taliyo in la kordhiyo xaddiga qaadhaanka, si loo ilaaliyo sinnaanta hawlgabka, agaasimuhu waa in uu ku wargeliyo guddida soddon (30) maalmood gudahood, kaddib helista warbixinta, guddiduna waa in ay soddon (30) maalmood gudahood ku wargeliso Madaxweynaha **JSL. Isla markaana Madaxweynuhu soddon (30) maalmood gudahood digreeto kusoo saaro.**

## Qodobka 37aad

## Bixinta qaadhaanka hawlgabka iyo hannaanka warbixineed

1) Waxa dawladda waajib ku ah, in ay si bille ah u soo gudbiso xogta qaadhaanka dhaqaale ee ay Hay'adda Hawlgabku ugu deeqday.
2) Hay'adda Hawlgabku waxa ay soo saaraysaa xeer-hoosaadyo hawlgab oo qeexaya: -

   b. Qaabka ay dawladdu, si bille ah ugu soo gudbinayso qaadhaankeeda iyo qaadhaanka shaqaalaha laga jaraba, xisaabaadka bangiyada uga furan Hay'adda Hawlgabka ee la ciyimay muddo toban (10) maalmood ah dhammaadka bil kasta.

   t. Diiwaannada xogta, xogaha iyo macluumaadka kale ee dawladdu u soo gudbinayso Hay'adda Hawlgabka ee ku saabsan qaadhaanka billaha ah. Warbixinahaas waxa lagu soo gudbin karaa qoraal ama hab elektaroonig ah, kolba sida loo arko in ay lagama maarmaan tahay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3) Sanduuqu waxa uu si sax ah u diiwaangalinayaa una xisaabinayaa qaadhaanka la bixiyay, isaga oo kala saaraya ta shaqaalaha iyo tan dawladda, waxaanu isticmaalayaa xogta ay dawladdu bixisay.
4) Sanduuqu waxa uu masuul ka noqonayaa xaqna u leeyahay in uu baadho, qiimeeyo, fuliyana bixinta qaadhaanka lagu sheegay xeerkan.
5) Sanduuqu waxa uu ugu yaraan 12kii biloodba mar siin doonaa, qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda xogta qaadhaanka dhaqaale ee uu helay iyo wadarta guud ee xaqiisa hawlgab. Sanduuqu waxa uu suurtagalin karaa in qof kastaaba si elektoroonig ah ku heli karo warbixinta, iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyadda casriga ah.
6) Haddii ay dhacdo in dawladdu xaddi ka badan qaadhaankii shaqaalaha laga jarayay ama dawladdu bixinaysay ku shubtay xisaabta Hay'adda, waxa u magdhabaysa hay'adda, si xeerka waafaqsan.
7) Qaadhaanka dheeraadka ah ee shaqaalaha dawladda waa loo celinayaa, isaga oo aan dulsaar la socon.
8) Wax lacag ah lagama celinayo qaadhaanka xaqii hawlgabka laga bixiyay.

## Qodobka 38[aad]
## Dhammaadka shaqada iyo da'da hawlgabka (Retirement Age)

1) Da'da hawlgabka shaqaalaha dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waa Shan iyo lixdan (65) sanno, sidda ku xusan Xeerka Haya'dda Shaqaalaha Dawladda.
2) Qof kasta oo shaqaale dawladeed ah oo gaadhay da'da shan iyo lixdan (65), welina shaqada ku jira marka uu xeerkani dhaqan galay, waxa uu noqonayaa hawlgab, waxaanu dalbanayaa xaqiisa hawlgab ee muddadii uu soo shaqeeyay.
3) Shaqaalaha dawladda waxa u bannaan in ay shaqada ka fadhiistaan ka hor da'da hawlgabka, dalbadaanna hawlgab wakhtigiisa ka soo hor maray, si waafaqsan xeerkan.
4) Qofka ka fadhiistay shaqada dawladdu waxa uu xaq u leeyahay xaqa hawlgabka, marka uu shaqada ka fadhiisto, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 39[aad]
## Xaqiijinta da'da shaqaalaha dawladda

1) Qof kasta oo shaqaale dawladeed loo qaato, waa in uu da'diisa caddeeyaa ka hor inta aanu shaqada bilaabin, waxaanu da'diisa ku caddayn karaa: -
    b. Shahaadada dhalashada.
    t. Kaadhka aqoonsiga qaranka ama
    j. Baasaaboor.
2) Haddii la caddayn kari waayo da'da qofka shaqaalaha ah, Hay'adda Hawlgabku waxa ay Wasaaradda Caafimaadka ka codsanaysaa, in ay qiimayn ku samayso da'da shaqaalahaas, bixisana shahaadada qiimaynta da'da.
3) Sanduuqu waxa uu aqoonsanayaa shahaadada qiimaynta da'da ee ay soo saartay Wasaaradda Caafimaadka Somaliland, si waafaqsan faqradda sare.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 40aad
## Qaaciidada hawlgabka ee da'da hawlgabka

1) Lacagta hawlgabka ee la siiyo shaqaalaha dawladda ee shaqeynaayay muddo toban (10) sanno ah ama ka badan ee gaadhay da'da hawlgabku, waxa ay helanayaan boqolkiiba hal dhibic lixdan iyo toddoba (1.67%) oo lagu dhuftay celceliska mushaharka aasaasiga ah ee sannadlaha ah ee uu qaatay shantii (5) sanno ee ugu danbeeyay.
2) Qofka shaqaale dawladeed ah ee shaqaynaayay muddo ka yar toban (10) sanno ee gaadhay da'da hawlgabka, waxa uu helayaa xaqa dhammaadka shaqada oo ah bil mushaharkeed oo ah mushaharka aasaasiga sannad kasta oo uu shaqeeyay, si waafaqsan qodobbada 51aad iyo 52aad ee xeerkan.
3) Iyadoo aan waxba loo dhimayn xaqa hawlgabka ee qofka shaqaalaha ah ee gaadhay da'da hawlgabka, xuquuqda hawlgabka ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan lagu dabbaqi maayo qofka shaqaale dawladeed ah ee shaqada looga saaray ama looga eryay sababo anshax marineed, si waafaqsan xeerkan. Waxaanu xaqiisa ku waayi karaa oo kaliya marka ay danbigiisa xukunto maxkamad awood u leh.

## Qodobka 41aad
## Hawlgabka xilliga hore ah

Haddii qofka shaqaalaha dawladda ahi uu hawlgabo ka hor da'dii hawlgabka, xaqa hawlgabka waxa la dhimayaa kala badhka boqolkiiba hal (1%/2) bil kasta oo hawlgabku ka soo hor maro da'dii hawlgabka.

## Qodobka 42aad
## Qiimaynta hawlgabka ee sababta hawlgabka xilliga hore ah

1) Qiimayn kasta oo halwgab, sanduuqu waxa uu xaqiijinayaa in khabiirku dib u qiimeeyo sababaha keenaya, in la yareeyo ama la kordhiyo xaqa hawlgabka, haddii loo baahdana waxa uu ku talinayaa, in wax ka beddel lagu sameeyo sinnaanta hawlgabka xilligiisa ka soo hor maray, xaqa hawlgabkana waxa loo xisaabinayaa, si waafaqsan xeerkan.

2) Haddii khabiirku ku taliyo wax ka beddelka sababaha kordhinta iyo yaraynta, si loo ilaaliyo sinnaanta xaqa hawlgabka, agaasimaha sanduuqu waa in uu 30 maalmood gudahood ku wargeliyo guddida oo isaguna Madaxweynaha ku wargeliyo.

## Qodobka 43aad
## Iswaafajinta xaqa hawlgabka iyo nolosha

1) Sanduuqu waxa uu iswaafajinayaa lacagaha la siiyo qofka hawlgabka ama dhaxlaha leh xaqa hawlgabka qofka geeriyooday

    b. Korodhka ku yimaadda celceliska billaha ah ee kharashaadka nolosha, taas oo ka bilaabmaysa kowda bisha January illaa 31 ka bisha December ee sannad kasta, sida uu go'aamiyo bangigu ama

    t. Korodhka celceliska mushaharka aasaasiga ah ee shaqaalaha dawladda ee sannad maaliyadeed kasta, sida ay go'aamiso Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Sanduuqu waxa uu isku waafajinayaa iskuna fadhiisaniyaa xaqa hawlgabka iyo nolosha muddo sagaashan (90) maalmood gudahood ah, kaddib marka uu helo ogaysiiska kama danbeysta ah ee uu oggolaaday Bangiga Dhexe ee celceliska bilaha ee qiimaha maceeshadda iyo celceliska mushaharka shaqaalaha dawladda ee billaha ah, laguna fadhiisiyay meceeshadda.
3) Sanduuqu ku qiimeyn maayo xaqa hawlgab ee la siiyo hawlgabka iyo dhaxlaha qofka hawlgabka xaqa u leh ee geeriyooday xaaladihii hore.
4) Sanduuqu marna u yarayn maayo lacagaha hawlgabka, sababo la xidhiidha kala duwanaanshaha lacagta hawlgabka iyo duruufaha nololeed.

## Qodobka 44[aad]

## Go'aaminta adeegga xaqa hawlgabka leh

1) Adeegga ama shaqada qofka loo xisaabinayo xaqa hawlgabku, waxa uu noqonayaa mid uu hore u qabtay ama mustaqbalka ah.
2) Adeegga ama shaqada hore waxa loo xisaabinayaa muddadii uu shaqaynayay ee ka horraysay kowda bisha koowaad sannadkii 2002, iyada oo loo eegayo sannaddada uu shaqaynaayay, sida ku suxan lifaaqa 1aad.
3) Adeegga ama shaqada hore ee diiwaangashan waxa loo xisaabinayaa muddadii uu shaqaynaayay laga soo soo bilaabo January 1-dii, 2002 illaa December 31-da, 2024.
4) Adeegga mustaqbalka waxa laga xisaabinayaa kowda bisha koowaad ee sannadka 2025, waxaana lagu salaynayaa diiwaanka qaadhaan ee shaqaalaha laga jaro iyo diiwaanka shaqo.
5) Hubinta adeegga xaqa hawlgabka leh, xisaabinta xaqa hawlgabka, codsiga, habka lacag bixinta iyo muddada qorshayntaba waxa ka masuul ah Hay'adda.

## Qodobka 45[aad]

## Arrimaha muhiimka ah ee la xidhiidha xaqa hawlgabka

1) Qofkii shaqaalaha ahiba waxa uu xaq u leeyahay hal xaq hawlgab oo keliya, dawladduna waxa ay bixinaysaa hal xaq hawlgab oo keliya qofkiiba.
2) Qofka qaatay xaqii hawlgabku, shaqaale dawladeed oo rasmi ah dib uma noqon karo.
3) Haddii qof shaqaale ah oo xaq u leh xaqii hawlgabku geeriyoodo, dadka dhaxalkiisa lihi waxa ay helayaan hal xaq halwgab oo keliya.

# CUTUBKA LIXAAD
# HAWLGABKA NAAFADA

## Qodobka 46[aad]

## Dadka laxaadka beela

1) Haddii qofku ka weyn yahay shan iyo toban (15) sanno, kana yar yahay da'dii hawlgabka, naafannimo awgeedna aanuu shaqo u qaban karin, waxa laga soo qaadayaa in uu naafo abadi ah yahay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Si loo caddeeyo xaaladda naafannimo, Wasaaradda Caafimaadka ayuu sanduuqu ka codsanayaa in ay caddayso naafannimada qofka.
3) Wasaaradda Caafimaadka ama guddida caafimaad ee loo saaray, waxa ay go'aaminayaan in naafannimadu keenayso in aanu qofkaasi shaqo uu mushahar ku qaato hadda qaban karin iyo in ay tahay naafannimo mustaqbalka ah.
4) Qofka la caddeeyo inuu naafo yahay, waxa uu arjiga dalabka hawlgabka naafada u soo gudbinayaa hay'adda muddo sagaashan (90) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda la caddeeyay in uu naafo yahay.

## Qodobka 47[aad]
## Qiimaynta naafannimada

1) Shahaadada qiimaynta naafannimo ee ay soo saartay Wasaaradda Caafimaadku ama Guddida caafimaad ee loo igmaday, waxa ay muujinaysaa waxyaabahan soo socda:
    b. Baadhitaanka caafimaad ee qofka codsaday naafannimada, taariikhdii uu naafoobay, saamaynta naafannimadu ku keenayso shaqada iyo meesha dhab ahaan uu wax ka noqday.
    t. Qiimayn ku saabsan in qofku shaqayn karo iyo in aanu shaqayn karin.
    j. Go'aaminta in ay macquul tahay in meel kale laga shaqaalaysiin karo iyo in kale, iyada oo la eegayo xaaladaha naafannimo.
    x. Go'aanka naafannimo oo dhammaystiran, kaas oo ah ka hor muddo hal sanno ama ka badan oo ah muddadii qofku aanu caafimaad ahaan u qaban arrin shaqo oo uu mushahar ku qaato iyo
    kh. Warbixin caafimaad oo sheegaysa, in naafannimada qofka shaqaalaha ahi tahay mid aan laga soo kabanayn iyo in kale.

2) Shaqaalaha naafada noqday waxa ay xaq u leeyihiin in ay Wasaaradda Caafimaadka ama guddida loo igmaday u soo gudbiyaan caddaymaha caafimaad ee dhakhaatiirta ay la kulmeen, hase yeeshee warbixinahaasi noqon maayaan kuwo ay ku go'aan qaadato wasaaradda ama guddidu.
3) Dadka ku nool, lagu hayo ama dhaqaale ahaan ka hela kaalmo hay'adaha daryeela naafada ee caafimaad ama diimeed ama hay'adaha dhaqaalaha ka hela dawladda, si ay u daryeelaan, naafadu xaq uma laha in la siiyo xaqa hawlgabka ee xeerkan lagu sheegay.
4) Dadka awooda in ay shaqeeyaan ama si uun loo shaqaaleeyay, sida in shaqo iskood ama gaar ah loo abuuray, xaq uma laha xaqa hawlgabka naafada, maaddaama xaqa hawlgabku istaago marka qofku awoodo in uu shaqeeyo.
5) Dadka qaata xaqa hawlgabka ciidanka, xaqa hawlgab ee ilaalinta bulsho ama xaq hawlgab oo kale oo loo bixiyo si waafaqsan xeerkan, xaq uma laha in ay helaan xaqa hawlgabka naafannimo.
6) Sanduuqu waxa uu xaqiijinayaa in qofka xaqa hawlgabka naafannimo dalbanayaa uu ka mid yahay dadka lagu sheegay faqradda 5aad ee qodobkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 48aad

**Baadhitaanka jidheed ama maskaxeed ee lagu go'aaminayo xaqa hawlgabka naafada:**

1) Sanduuqu waxa uu ka dalban karaa qofka naafannimada codsanayaa, in uu hor tago Wasaaradda Caafimaadka ama guddi caafimaad oo kiiskiisa loo xilsaaray, si baadhitaan loogu sameeyo xaaladdiisa naafannimo mar kasta oo uu sanduuqu go'aansado sidaas.
2) Faqradda 1aad waxa kale oo lagu dabbaqayaa dadka hore u qaadanaya xaqa hawlgabka naafada ee naafannimadooda dib u eegis lagu samaynayo.
3) Qof kasta oo ka dhego adayga in uu maro baadhitaannada lagu sheegay faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan waxa laga joojinayaa hawlgabka naafada ee uu qaato, haddii aanu cudurdaar macquul ah keenin, guddiduna ku qancin.

## Qodobka 49aad

**Xaddiga iyo muddada xaqa hawlgabka naafada:**

1) Qofka shaqaalaha ah ee naafada ahi waxa uu xaq u leeyahay, in uu helo faa'iido hawlgab oo u dhiganta intii uu heli lahaa, haddii uu caafimaad qabo oo uu shaqada sii wadan lahaa, hawlgabkana ku bilaabi lahaa da'da hawlgabka.
2) Xaqa hawlgabka naafada waxa uu qofku helayaa inta uu nool yahay, haddii aanu shaqaaluhu ka soo kaban naafannimada.

## Qodobka 50aad

**Waajibka wargelinta:**

1) Sanduuqu qoraal ayuu ku wargelinayaa uguna sheegayaa qofka shaqaalaha ah ee dalbaday xaqa naafada, natiijada codsigiisa sagaashan (90) maalmood gudahood oo ka bilaabmaya helitaanka codsiga. Muddadaas waa la kordhin karaa oo waxa laga dhigi karaa boqol iyo siddeetan (180) maalmood, si hubin caafimaad oo dheeraad ah loo sameeyo, haddii ay sidaas codsato Wasaaradda Caafimaadku.
2) Qofka qaata xaqa hawlgabka naafadu, sida ugu dhakhsaha badan ayuu hay'adda ugu wargelinayaa, haddii isbeddel ku yimaaddo xaaladdiisa caafimaad, isbeddelkaasina uu saamaynayo xaqa naafada ee uu qaato.
3) Sanduuqu waxa uu shaqaalihiisa amar ku siin karaa, in ay fuliyaan baadhitaan lagu hubinaayo xaaladaha dadka qaata xaqa hawlgabka naafada, iyada oo wax ogaysiis ah aan la siinin dadka ay khusayso.
4) Shaqaalaha hay'adda ee la amray, si waafaqsan faqradda 3aad ee qodobkan, waa in ay aqoonsiyadooda tusaan dadka ay baadhitaanka ku samaynayaan, wax xadgudub ahna aanay samayn.
5) Sanduuqu waxa uu dejinayaa habraacyo la'xidhiidha kormeerka dadka qaata xaqa hawlgabka naafada, si loo hubiyo in loo sii wado iyo in kale iyo in la hubiyo shaqo'abuur kale oo loo samayn karo.
6) Dadka qaata xaqa hawlgabka naafada waxa waajib ku ah in ay maraan baadhitaannada caafimaad ee sanduuqu ka dalbado mar walba.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

7) Diidmo kasta oo lagu diido codsiyada rasmiga ah ee sanduuqu ku codsanayo, in lagula socdo sii wadista xaqa hawlgabka naafadu, waxa uu keenayaa in la hakiyo xaqaas, hakintaasina way sii soconaysaa illaa baadhitaanka hubinta ah la dhammaystirayo.

## CUTUBKA TODDOBAAD
## XAQA HAWLGABKA EE DHAXLAYAASHA IYO XAQA DHAMMAADKA SHAQADA

### Qodobka 51[aad]
### Xuquuqda hawlgab ee dhaxlayaasha

1) Sanduuqu waxa uu siinayaa xuquuqda dhaxalka ah ee qofka hawlgabay dhaxalkiisa xaqa u leh ee uu ka tagay marxuumka hawlgabka lahaa.
2) Dhaxalaha ama dhaxlayaasha qofka hawlgabay ee dhintay waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xaqii hawlgab ee uu qaadanayay marxuumku, inta aanuu dhiman.
3) Haddii, xaqa hawlgabka loo kordhiyo sababo la'xidhiidha iswaafajinta maceeshadda, si waafaqsan xeerkan, xaqa dhaxalaha ama dhaxlayaasha isagana wuu la kordhayaa.
4) Dhaxalaha ama dhaxlayaasha xaqa u leh, xaqa hawlgabka ee qofka dhintay ee da'diisu leekayd ama ka weyneyd da'da lagu hawlgabo markii uu dhintay, waxa ay xaq u yeelanayaan xaqa hawlgab ee uu qaadan lahaa qofka shaqaalaha ah ee geeriyooday.
5) Haddii, shaqaale dawladeed oo aan gaadhin da'dii hawlgabka, welina shaqadii ku jiraa uu sababo la xidhiidha dhaawac ama xanuun shaqada ka soo gaadhay awgeed u geeriyoodo, dhaxalaha ama dhaxlayaashu waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xaq hawlgab oo ku salaysan xaddiga lacageed ee uu marxuumku hawlgab u qaadan lahaa.
6) Haddii uu shaqaale dawladeed oo aan gaadhin da'dii hawlgabka, welina shaqadii ku jiraa uu sababo aan shaqada la xidhiidhin oo dabiici ah u geeriyoodo, dhaxalaha ama dhaxlayaashu waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan xaq hawlgab oo ku salaysan xaddiga lacageed ee uu marxuumku hawlgab u qaadan lahaa.
7) Dhaxalaha ama dhaxlayaasha leh xaqa shaqaale hore oo geeriyooday, kaas oo aan hayn adeeg xaq hawlgab ka dhalanayo, xaqna u leh hawlgab dib loo dhigay wakhtiga dhimashada, waxa ay xaq u leeyihiin hawlgab ku salaysan xaqa hawlgab ee uu qaadan lahaa qofkaa shaqaalaha dawladeed ah ee geeriyooday.
8) Xaqa hawlgabka dhaxalaha ama dhaxlayaasha waxa la siinayaa oo keliya dadka xaqa u leh ee loo aqoonsaday, si waafaqsan xeerkan, shaqaalaha dawladda iyo dadka xaqa hawlgabka leh ee aan lahayn dhaxalka xeerku tilmaamay, cid kale uma codsan karaan in la siiyo xaqa hawlgab ee dhaxlayaasha.
9) Sinaba wadarta guud ee xaqa hawlgabka la siinayo dhaxalaha ama dhaxlayaasha xaqa u leh ee marxuumka shaqaalaha ah ee geeriyooday iyo dadka xaqa hawlgabka qaataa ugama badan karo boqolkiiba toddobaatan (70%) xaqii hawlgab ee qofka xaqaas lahaa qaadanayay ka hor dhimashada ama xaqa hawlgab ee qofka shaqaalaha dawladda ah loo siinayo, si waafaqsan xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 52[aad]

### Xaqa hawlgab ee qoysaska dadka la waayay lagana soo qaaday in ay dhinteen

1) Marka qof shaqaale dawladeed ah oo xaq hawlgab qaadanayay la waayo, muddo ugu yaraan illaa saddex sanno ahna aan wax war ah laga helin, sidaana ay soo caddeeyeen hay'adaha awoodda u leh sanduuqu, waxa uu ka soo qaadayaa in qofkaasi dhintay, waxaanu siinayaa dhaxalaha ama dhaxlayaasha xaqa u leh xaqa hawlgab ee lagu sheegay qodobbada cutubkan.
2) Xaqa hawlgabka shaqaalaha la waayay waxa laga bilaabayaa bishii ka dambaysay bishii la waayay ilaa taariikhda dhimashada dhaxalaha ama dhaxlayaasha xaqa u leh ama inta qofka shaqaalaha ah ee la waayay laga helayo.
3) Haddii soo laabashada qofka shaqaalaha ah ee maqnaa la soo caddeeyo, xaqii hawlgab ee dhaxlayaasha waa la joojinayaa, xaqa hawlgab ee ku salaysan da'da hawlgabka ayaa la bilaabayaa, waana in lagu muujiyo lacagta hawgab ee dhaxlayaasha la siiyay.

## Qodobka 53[aad]

### Xaqa hawlgab ee dhaxlayaasha shaqaalaha dawladeed ee dhintay:

1) Dadka xaqa u leh in ay helaan xaqa hawlgab ee qofka shaqaalaha ah ee geeriyooday waa xubnaha qoyskiisa ee noolaa markii uu shaqaaluhu geeriyooday.
2) Xaaska (rag iyo dumarba) laga geeriyooday waxa uu xaq u leeyahay/u leedahay in uu/ay helo/hesho xaqa hawlgabka ee dhaxlaha ama dhaxlayaasha, haddii ay is qabeen taariikhda dhimashada, isla markaana aanay is furin, si waafaqsan shareecada islaamka.
3) Haddii, ninku uu leeyahay xaasas badan, waxa loo raacayaa sida ku xusan faqradda 2aad.
4) Ilmaha marxuumka geeriyooday uu dhalay waxa uu xaq u leeyahay in uu helo xaqa hawlgabka waalidkii, inta uu ka yar yahay da'da **toddoba iyo toban (17) jir.**
5) Ilmaha ka weyn da'da **toddoba iyo toban (17)** sanno jir, hase yeeshee ah naafo, lana soo caddeeyay in uu naafo ahaa markii waalidkii dhintay, waxa uu xaq u yeelanayaa xaqa hawlgabka dhaxlaha ama dhaxlayaasha, illaa inta uu ka bogsanayo naafannimadaas. Wasaaradda Caafimaadka ayaa si xeerkan waafaqsan u hubinaysa in naafannimadu ka joojinayso in uu shaqaysto, hase yeeshee ilmaha naafo noqda kaddib dhimashada waalidkii xaq u yeelan maayo in uu helo xaqa hawlgabka dhaxlaha ama dhaxlayaasha, haddii uu da'da **toddoba iyo toban (17)** sanno jir ka weynaa markii uu geeriyooday waalidkii.
6) Bisha uu ilmuhu gaadho da'da **toddoba iyo toban (17)** sanno jir ama ka bogsado naafannimada ayaa ah bisha ugu dambaysa ee la siinayo xaqa hawlgabka dhaxlayaasha ilmahaas.
7) Sanduuqu waxa uu siinayaa xaqa hawlgabka dhaxlayaasha ilmaha keliya, kaddib marka la xaqiijiyo da'da ilmaha, lana soo gudbiyo shahaadadiisa dhalashada ama shahaadada qiimaynta da'da ee ay soo saartay Wasaaradda Caafimaadku. Marka da'da ilmaha la diiwaangaliyo waa kama dambays, cid wax ka beddeli kartaana ma jirto.

## Qodobka 54[aad]

### Aqoonsiga dhaxlayaal dheeraad ah:

1) Sanduuqu waxa uu qoraal ku wargelinayaa dhaxlaha ama dhaxlayaasha xaqa hawlgabka natiijada codsigooda muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Iyada oo nuxurka faqradda 1aad sideeda ahaanayso, dhaxlayaasha dheeraadka ah ee qofka dhintay waxa ay haystaan muddo sannad ah oo ka bilaabanta taariikhda dhimashada waalidkood in ay ku soo gudbistaan codsigooda la'xidhiidha xaqa hawlgab ee dhaxlaha ama dhaxlayaasha.
3) Haddii, ay dhacdo in sanduuqu oggolaado codsi yaraynaya ama meeshaba ka saaraya xaqa hawlgabka dhaxlaha oo hore loo siiyay dhaxle kale, sanduuqu dib ayuu u xisaabinayaa, waxaanu dhimayaa xaqa hawlgab ee la siiyay dhaxlaha ama dhaxlayaasha qofkaas shaqaalaha ah, sida loogu baahdo. Wixii lacag dheeraad ah ee la bixiyayna waxa loo magdhabayaa, si waafaqsan qodobbada xeerkan.

## Qodobka 55^aad
## Xaddiga lacageed ee xaqa hawlgabka dhaxlaha/dhaxlayaasha

1) Wadarta guud ee xaqa hawlgabka dhaxlayaasha qof kasta oo shaqaale dawladeed ahi waxa uu noqonayaa boqolkiiba toddobaatan (70%) xaqa qofka dhintay, waxaana si siman loogu qaybinayaa dhammaan dhaxlayaasha xaqa u leh, si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo shareecada Islaamka.
2) Haddii ay dhacdo in marxuumku ka tagay hal xaas wax ka badan, buuxinayana shuruudaha xeerkan, xaqa hawlgabka waxa si siman loogu qaybinayaa dhammaan xaasaska nool.
3) Haddii, marxuumku ka tagay hal xaas oo keliya oo buuxinaysa shuruudaha xeerkan, carruur xaq u leh dhaxalkana ay u dhashay, xaqa hawlgabka waxa si siman loogu qaybinayaa xaaska iyo carruurta.
4) Haddii, marxuumku lahaa hal xaas oo keliya, wax carruur ahina aanay jirin, dhaxalka marxuumka waxa loo qaybinayaa, si waafaqsan shareecada Islaamka.
5) Haddii, marxuumka geeriyooday aanuu xaas ka tagin, laakiin uu carruur ka tagay, xaqa hawlgabka dhaxlayaasha waxa si siman loogu qaybinayaa carruurtaas, si waafaqsan shareecada Islaamka.
6) Haddii, marxuumku aanu xaas iyo carruur midna ka tagin, xaqa hawlgabka dhaxlayaasha lama bixinayo.

## Qodobka 56^aad
## Dhimashada dhaxlaha ama luminta xaq u lahaanshaha xaqa Hawlgabka:

1) Sanduuqu wuu ka joojinayaa xaqa hawlgabka dhaxlaha, haddii uu dhinto ama uu lumiyo xaq u lahaanshaha qaadashada xaqa hawlgabka ee uu dhaxalkeeda lahaa, si waafaqsan qodobbadan.
2) Marka ay dhacdo in la joojiyo xaqa hawlgab ee dhaxlaha, si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, baaqiga lacagta ah ee soo hadha waxa loo qaybinayaa dhaxlayaasha xaqa u leh.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 57aad

### Xaqa dhammaadka shaqada (xaqsiinta)

1. Qofka kasta oo shaqaale ah oo ugu yaraan 10 sanno isaga oo shaqeeynay gaadha da'da hawlgabku, waxa uu xaq u yeelanayaa in hal mar la wada siiyo xaqiisa hawlgabka.
2. Haddii, uu geeriyoodo qofka shaqaalaha ah ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan (isaga oo aan wali la siin xaqiisii hawlgabka), waxa xaq u yeelanaya dhaxlayaasha uu ka tago marxuumku oo 75% heli doona xaqii uu marxuumkaasi ku lahaa dawladda. Xeer-nidaamiye gaar ah ayaana tilmaami doonaa iyo wixii xeer ah loo raaci doono.

## Qodobka 58aad

### Habka loo xisaabinayo bixinta xaqa hawlgabka

1. Xaqsiinta hawlgabka ee qofka shaqaalaha ah ee hawlgabka ah waxa loo xisaabin doonaa hab sannadle ah, iyadoo sannadkiiba lagu salayn doono mushaharkiisa u dambeeya ee billaha ah
2. Qofka shaqaalaha ahi waa in uu codsado in la siiyo xaqa hawlgabkiisa muddo 6 bilood gudahood ah oo ka bilaabmaysa waqtiga uu gaadho da'da hawlgabka.
3. Qofka Shaqaalaha ah ee iskii uga taga shaqada uu u hayay dawladda isaga oo aan gaadhin da'dii hawlgabka, waxa uu xaq u leeyahay in uu helo xaqsiin u dhiganta muddada uu shaqeynayay, iyada oo halkii sannaba lagu salayn doono mushahar bileedkiisa u dambeeyay.
4. Shaqaalaha sida waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan la siiyo xaqiisu, waxa uu dib ugu shaqayn karaa hay'ad kale oo dawladeed, isaga oo shaqaale dawladeed ah, waxaana dib loo xisaabin doonaa muddadii hore ee uu shaqaalaha ahaa iyo muddada dambe ee uu shaqada ku soo laabtay, waxaana looga bilaabayaa muddadii uu ku soo noqday shaqada.

# CUTUBKA SIDDEEDAAD

# CODSIYADA XAQA HAWLGABKA, DHAMMAADKA SHAQADA IYO LACAG BIXINTA:

## Qodobka 59aad

### Codsiga ka hawlgabista shaqada:

1) Qofka shaqaale dawladeed ah ee hawlgabayaa waxa uu u soo gudbinayaa hay'adda, codsigiisa dalbashada xaqa hawlgab, isaga oo ugu soo gudbinaya sida iyo habka uu tilmaamo sanduuqu.
2) Qof kasta oo shaqaale dawladeed ahi waxa uu u soo gudbinayaa hay'adda xogta qoyskiisa sida xaaskiisa (ama xaasaskiisa) iyo carruurtiisa isaga oo raacaya habraacyada hay'adda, si dadkaasi ay u helaan faa'iidada hawlgab, haddii uu geeriyoodo.
3) Marka uu hawlgabo qofka shaqaalaha ahi, sanduuqu waxa uu dalbanayaa in loo soo gudbiyo xogta cusub ee dhammaan dhaxlayaasha.
4) Qofka shaqaalaha ama hawlgabka ahi wuu cusboonaysiin karaa xogaha qoyskiisa ee lagu sheegay faqradaha qodobkan, mar kasta oo xogtu is beddesho.



XAFIISKA GARYAQAANKA GU'UD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 60aad

**Oggolaanshaha iyo bixinta xaqa hawlgabka ama xaqa dhammaadka shaqada:**

1) Sanduuqu waxa uu dejinayaa hannaanka oggolaanshaha codsiyada xaqsiinta iyo hawlgabka lagu dalbanayo, waxaanu codsiyada kaga jawaabayaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalintii uu codsigu soo gaadhay.
2) Sanduuqu waxa uu codsan karaa xog dheeraad ah, waxaanu codsan karaa soddon (30) maalmood oo kale oo dheeraad ah oo ka bilaabma marka uu jawaabta codsiga helo.
3) Xaqa hawlgabka waxa la bixinayaa dhammaadka bisha ku xigta, bisha go'aanka laga gaadhay cosiga faa'iidada hawlgabka lagu codsaday.
4) Lacagta laguma bixinaayo caddaan (kaash) ee Bangiga dhexe ama bangi kale oo sanduuqu xidhiidh la leeyahay ayaa loogu shubayaa qofka.
5) Taariikhda dhaqangalka xaqa hawlgabku waxa ay noqonaysaa taariikhda qofka hawlgabka ah ama dhaxlayaashiisu buuxiyo shuruudaha xeerkani tilmaamay.

## Qodobka 61aad

**Hubinta sii socoshada shuruudaha xaqa hawlgabka:**

Sanduuqu waxa uu dejinayaa habraacyo uu ku hubinayo sii socoshada ama jiritaanka shuruudaha qofka xaqa u siiyay in uu helo dhammaan xuquuqda hawlgab, sida: hawlagbka xilliga hore, hawlgabka qofku gaadhay da'dii hawlgabka, xaqa hawlgab ee naafada iyo dhaxlayaasha.

## Qodobka 62aad

**Dhimashada shaqaalaha ama qofka hawlgabka ah:**

Haddii uu qofka shaqaalaha dawladda ah ama hawlgabka xaqa u lihi geeriyoodo, isaga oo shaqada ku jira, sanduuqu waxa uu bixinayaa xaqa hawlgabka ee dhaxlayaasha, si waafaqsan qodobbada xeerkan.

## Qodobka 63aad

**Qofka shaqaalaha ah ama hawlgabka ah ee la waayo:**

1) Iyada oo ay sideeda ahaanayso wixii ka soo horjeeda ee xeer kale ku jiraa, haddii qofka shaqaalaha ah ama hawlgabka xaqa u leh la waayo, lana soo caddeeyo in aanay muddo saddex sanno ah war ka helin dadkii ay ahayd in ay xogtiisa helaan geeri iyo nolol, waxa laga soo qaadayaa in uu geeriyooday.
2) Haddii laga soo qaado in uu geeriyooday ama geeridiisa dhab ahaan loo xaqiijiyo, waxa la dabbaqayaa qodobka 57aad ee xeerkan.

## Qodobka 64aad

**Dhimashada timaadda inta hawlgabka lagu jiro:**

1) Haddii uu qofku isaga oo da'dii hawlgabka gaadhay guursado, isaga oo xaqii hawlgabka qaatana geeriyoodo, xaqiisa hawlgab waxa la siinayaa qoyskiisa (xaaskii iyo carruurtii) si waafaqsan qodobbada xeerkan.



XAFISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Bixinta xaqa hawlgab ee lagu sheegay faqradda 1aad waxa ay ka bilaabmaysaa bisha ku xigta, bisha uu qofku geeriyooday.

## Qodobka 65aad
## Wareejin shaqo

Haddii, qofka shaqaalaha ahi wareejiyo shaqadiisa dawladda, una wareego hay'ad kale oo isla dawladda ah laguna maamulo xeerka shaqaalaha dawladda, isla adeeggaa hawlgabka leh ayaa loo xisaabinayaa xaqa hawlgab oo keli ah.

## Qodobka 66aad
## Xuquuqda hay'adda ee aan la qaybinayn

1) Sanduuqu ma siinayo faa'iido hawlgab:
    b. Qof shaqaale ah oo weli shaqadii dawladda ku jira iyo
    t. Qofka kale toona ha noqoto deyn ahaan, horumarin ama wax la mid ah.
2) Iyada oo wixii qodobbo sharci ah ee jiraa sidooda ahaanayaan, xuquuqda hawlgab ee loo bixiyay si xeerkan waafaqsani noqon maayaan: -
    b. Qaar la dammaanad qaaday ama la wareejin karo, haddii aanay ahayn: -
        I. Deyn ay dawladdu leedahay ama
        II. Amar maxkamadeed oo amraya in bixinta lacago muddaysan oo la siiyo xaaska ama ilmaha qofka shaqaalaha ah ee xaqa hawlgabka, xaqa dhammaadka shaqada ama gunnada kale la siiyay.
    t. Mid lagu xidho bixinta lacag kasta oo la sheegto, sida ay doonto ha ahaatee.

# CUTUBKA SAGAALAAD
# QODOBBO KALA DUWAN

## Qodobka 67aad
## Dembiyada

1) Qof kasta oo: -
    B. Si badheedh ah u diida in uu bixiyo qaadhaanka hay'adda.
    T. Isaga oo og ama xog been ah siiya Hay'adda ama isaga oo ah xubin guddi ama ka mid ah shaqaalaha hay'adda, si ku talagal ah ugu takrifala hantida hay'adda, waxa uu galay dembi, waxaanu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn shan boqol (500) oo doollar ama xabsi aan ka badnayn laba sanno ama labadaba.

2) Haddii dembiga qodobkan ku xusan ay hay'adi gasho, qof kasta oo xilligii dembigaasi dhacay ahaa-
    B. Agaasime Guud ama xil la mid ah ka hayay hay'adda ama
    T. Kusime ka ahaa xilalka lagu sheegay xarafka (b) ayaa galay dembigaas.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn faqradda 2aad ee qodobkan, haddii qofku soo caddeeyo in aanu dembigaasi oggolaanshihiisa ku dhicin, wax kasta oo uu kaga hortagaayana uu sameeyay awooddiisa, dembigaas loo raaci maayo.

## Qodobka 68aad
## Ku takrifalka hantida

Shaqaalaha Hay'adda, xubinta guddida, agaasimaha Hay'adda ama ammaano-hayaha ku takrifala hantida sanduuqu, waxa uu galay dembi, waxaanu bixinayaa qiime u dhigma saddex laab, qiimaha hantida uu ku takrifalay ama xadhig aan ka badnayn saddex sanno ama labadaba.

## Qodobka 69aad
## Xil ka qaadista

Iyada oo qodobbada sharci ee xeer kale oo kastaa sidooda ahaanayaan, guddidu iyaga oo aan waxba ka beddelin ciqaabta xeerkani tilmaamay, waxa ay xilka ka qaadi karaan xubin kasta ama shaqaale kasta oo lagu helay dembiyada ku xusan xeerkan.

## Qodobka 70aad
## Ka dhaafista masuuliyadda shakhsiga ah

Xubinta guddida ama shaqaalaha Hay'adda ee iyada oo si niyad wanaag ah oo xeerka waafaqsan u gudanaysa waajibkeeda u gasha fal keeni kara masuuliyad shakhsi ah, masuuliyaddaas shakhsiga ah loo raaci maayo.

## Qodobka 71aad
## Masuuliyadda magdhawga

Qodobbada xeerkani ka dhaafi maayaan Hay'adda, in uu magdhaw ka bixiyo wixii waxyeello ama dhib ah ee loo geysto qof, hantidiisa ama danihiisa ee ka dhasha fulinta awoodaha hay'adda ee xeerkan ama xeer kale lagu sheegay.

## Qodobka 72aad
## Qodobbada kala guurka ah

1) Inta uu sanduuqu cagihiisa isku taagayo, waxa muddo aan ka badnayn laba sanno gacanta ku haynaysa oo maamulaysa Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
2) Sanduuqu waxa uu ku xisaabinayaa xuquuqda adeegyadii hore ay u qabteen shaqaalaha dawladdu, muddo hal sanno ah gudaheed oo ka bilaabanta maalinta xeerkani dhaqangalo.
3) Qof kasta oo shaqaale ah oo hore loo siiyay xaqa hawlgabka, xaqaasi wuu u sii soconayaa dhaxlayaashiisuna waxa ay xaq u leeyihiin in ay xaqa hawlgabkiisa helaan, si waafaqsan xeerkan.
4) Nidaamkan kala guurka ah ee qaaciidada xaqa hawlgabka ayaa la dabaqi doonaa: -
   b. Xaqa hawlgab ee bislaanaya sannadka bilaabmaya, kaddib dhaqangalka xeerkan, waxa loo raacayaa qaaciidada mushaharka aasaasiga ah ee sannadka ugu dambeeyay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

t. Xaqa hawlgab ee bislaanaya sannadka bilaabma laba (2) sanno kaddib dhaqangalka xeerkan, waxa loo raacayaa qaaciidada celceliska mushaharka aasaasiga ah ee labadii sanno ee ugu dambeeyay.

j. Xaqa hawlgab ee bislaanaya sannadka bilaabmaya saddex (3) sanno kaddib dhaqangalka xeerkan, waxa loo raacayaa qaaciidada celceliska mushaharka aasaasiga ah ee saddexdii sanno ee ugu dambeeyay.

x. Xaqa hawlgab ee bislaanaya sannadka bilaabmaya afar (4) sanno kaddib dhaqangalka xeerkan, waxa loo raacayaa qaaciidada celceliska mushaharka aasaasiga ah ee afartii sanno ee ugu dambeeyay.

kh. Xaqa hawlgab ee bislaanaya sannadka bilaabmaya shan (5) sanno kaddib dhaqangalka xeerkan, waxa loo raacayaa qaaciidada celceliska mushaharka aasaasiga ah ee shantii sanno ee ugu dambeeyay.

5) Xuquuqda hawlgab ee la siiyo dhaxlayaasha qofka shaqaalaha ah ee geeriyooday waxa ay noqonaysaa mid la siiyo dhaxlayaasha xaqa u leh, haddii marxuumku ugu yaraan lixdan (60) maalmood shaqaynayay kaddib dhaqangalka xeerkan.
6) Xuquuqda hawlgab ee dadka naafada ah loo siiyo si xeerkan waafaqsan waxa ay noqonaysaa mid la siiyo haddii qofku ugu yaraan lixdan (60) maalmood shaqaynayay, kaddib dhaqangalka xeerkan.
7) Guddida sanduuqu maalgashi ayay ku samaynayaan hantida hawlgabka, si waafaqsan qodobka 19aad ee xeerkan, keliya haddii Bangiga Dhexe ee Somaliland oggolaado.
8) Xaaladaha maalgashi ee kale ee lagu sheegay qodobka 19aad ee la hirgaliyay, ka hor dhaqangalka xeerkan waa waxba kama jiraan.
9) Xaqa hawlgab ee hore loo bixiyay, si waafaqsan faqradda 4aad ee qodobkan waxa dib loogu celinayaa, keliya taariikhda uu xeerkani dhaqangalo.

## Qodobka 73[aad]
## Xallinta khilaafaadka

1) Cabasho kasta oo ka timaadda dadka xaqa hawlgabka leh oo lagaga cabanayo go'aanka Hay'adda, waxa marka hore loo gudbinayaa guddida, iyada oo qoraal ah muddo soddon (30) maalmood gudahood, kaddib helitaanka go'aanka laga cabanayo.
2) Dadka cabanaya waa in loo sheegaa in ay xaq u leeyihiin in ay ka cawdaan (rafcaan ka qaataan) go'aan kasta oo ku saabsan codsigooda oo aanay ku qancin.
3) Qof kasta oo cabasho u gudbinaya guddidu, waa inuu sababeeyaa sababta uu go'aanka uga cabanayo, cabasho kasta oo bilaa sabab ahi ma yeelanayso tixgelin.
4) Guddidu cabashooyinka iyo rafcaannada loo soo gudbiyay way darsayaan, waxaanay ka soo saarayaan go'aan qoraal ah muddo soddon (30) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalintii cabashada loo soo gudbiyay.
5) Qofka cabanaya waxa loo oggolaanayaa in uu ka qaybgalo kulanka dhagaysiga ee guddida, si uu u bixiyo xogo dheeraad ah haddii uu isagu sidaas codsado.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

6) Haddii, sababaha cabashadu la'xidhiidho xaaladaha caafimaad ee qofka cabanaya, amaba haddii ay guddidu lagama maarmaan u aragto, waxa ay:-

b. Ka dalban kartaa qofka cabanaya in uu baadhitaan caafimaad oo dheeraad ah soo maro ama

t. Ka codsan kartaa hay'adda, in uu dib u eego codsiga qofka cabanaya, hubiyana qiimayntii iyo go'aankii hore.

7) Dadka cabanaya ee sababo la'xidhiidha xaaladdooda naafannimo aan awoodin in ay iyagu cabashadooda toos u gudbiyaan, waxa ay wakiilan karaan dad iyaga metela, hase yeeshee qofkaas waxa waajib ku ah in uu maro wixii qiimayn caafimaad ah ee looga baahdo.

## Qodobka 74aad
## Guddida cabashooyinka iyo ilaalinta bulshada

1) Waxa xeerkan lagu dhisay guddida cabashooyinka iyo ilaalinta bulshada oo dhagaysanaysa, go'aanna ka gaadhaysa cabashooyinka ka yimaadda go'aannada guddida ee lagu sheegay qodobka 67aad ee xeerkan.
2) Guddida lagu dhisay faqradda 1aad ee qodobkani tiro ahaan waxay ka koobnaanayaan shan (5) xubnood, qaabdhismeedka, nidaamka dhagaysiga cabashooyinka iyo sida ay ku imanayaanba waxa go'aaminaysa dawladda Somaliland.
3) Guddidu waxa ay ku meel marinayaan go'aannadooda aqlabiyad, haddiise la is leekaado guddoomiyaha ayaa yeelanaya cod dheeraad ah.
4) Haddii lagu qanci waayo go'aanka guddida, waxa rafcaan looga qaadanayaa Maxkamadda Sare soddon (30) maalmood gudahood, marka go'aanka guddida la helo.
5) Go'aanka Maxkamadda Sare waa mid kama dambays ah oo ma jirto meel lagaga caban karaa.

## Qodobka 75aad
## Cashuur Dhaafka

Wax cashuur ah laga qaadi maayo xaqa hawlgabka, qaadhaanka hawlgabka ee la ururiyay iyo xuquuqda laga helo maalgashiga lagu sameeyo lacagaha hawlgabka, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 76aad
## Xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada kale

1) Hay'adda oo kaashanaysa guddida waxa ay diyaarinaysaa xeer-hoosaadyada xeerkan ka dheegma si loo gaadho ujeeddoyinka xeerkan.

2) Iyada oo aan la'xaddidayn nuxurka guud ee faqradda 1aad ee qodobkan, waxa la samayn karaa xeer-nidaamiyayaal kala duwan oo qeexaya: -

b. Xogaha muhiimka ah iyo caddaymaha ee la'xidhiidha sugidda iyo saxnimada codsiyada xaqa hawlgabka iyo dadka xaqa u leh.

t. Tallaabooyinka ay tahay in loo qaado si xeerkan waafaqsan, wakhtiga iyo sida loo qaadayo, habraacyada loo raacayo iyo foomamka la isticmaalayo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR ... OFFICE

3) Sanduuqu, sidoo kale waxa uu diyaarin karaa hagayaal, halbeegyo iyo xeerar hab dhaqan, iyada oo laga duulayo hadba baahida jirta.

## Qodobka 77aad
## Laalid ama nasakhid

1) Waxa halkan lagu laalay ama lagu nasakhay da'da hawlgabka ee ku xusan qodobka 62aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda **Xeer Lr: 97/2022;**
2) Waxa kale oo halkan lagu laalay ama lagu nasakhay xeer kasta ama qodob kasta oo ku jira xeer dhaqangal ah oo ka hadlaya hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 78aad
## Dhaqangalka xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka golayaasha xeerdejintu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo, isla markaana faafinta rasmiga ah lagu soo saaro.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**
____[____________________

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**
____[____________________

## LIFAAQA 1AAD

| Sannadka Dhalashada | Da'adu markay gaadho 2025 | Sannadka uu Hawlgabayo | Sannadada shaqo ee la diiwaangaliyay | Shaqada Sannaddadii hore ee bilaa diiwaanka ahaa | Wadarta Sannaddada uu helay qofku |
|---|---|---|---|---|---|
| 1960 or earlier | 65 or older | 2025 | 23 or less | 7 | 30 |
| 1961 | 64 | 2026 | 24 or less | 6 | 30 |
| 1962 | 63 | 2027 | 25 or less | 5 | 30 |
| 1963 | 62 | 2028 | 26 or less | 4 | 30 |
| 1964 | 61 | 2029 | 27 or less | 3 | 30 |
| 1965 | 60 | 2030 | 28 or less | 2 | 30 |
| 1966 | 59 | 2031 | 29 or less | 1 | 30 |
| 1967 or younger | 58 | 2032 | 30 or less | 0 | 30 |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE